

REPORT OF THE HOUSE OF REPRESENTATIVES (HoR) AD HOC COMMITTEE (THE JIRDEH COMMITTEE) ON THE 2004 HoR ELECTION BILL

December 2004

Title of Report: Completion of the House of Representatives Election Law

The Ad hoc Committee was chaired by Mr Abduqadir Haji Ismail Jirdeh, who was, at the time the Deputy Speaker of the House of Representatives, and the committee was assisted by the independent researcher Dr Abdirazak Aqli. The report was presented to the House in December 2005.

The report deals comprehensively with the electoral systems in Somaliland since 1959 and addresses the vexing issues of the regional allocation of parliamentary seats, choice of voting systems and the demarcation of the regions . It is, in my view, the best House committee report that has been undertaken on any proposed legislation in the Republic of Somaliland and is a credit to both the Chair of the committee and to the researcher.

This copy of the Report was previously published as an appendix to the Somaliland Electoral Laws Handbook which I published in January 2009. Although the issue of whether the HoR elections should be based on a majoritarian system or on a proportional representation (PR) system has been settled and the latter has been adopted, some question whether the open list system used for both the 2005 HoR election and the 2012 district council elections may have promoted clanism much more than the closed list system used in the 2002 district council elections. The PR system is, however, widely accepted and many also prefer the open list system for the voters' direct involvement in separating candidates in the party lists. The other difficult issues of regional allocation of seats, population census, and boundaries of regions/districts, however, still remain and the Report's coverage of these matters is as pertinent now as it was in 2004.

I have added as a footnote to the regional polling figures in page 19 (which covered, when the Report was written, only the 2002 and 2003 elections figures) the NEC published total polling figures for each region (and nationally) during the elections held, since the Report, in 2005, 2010 and 2012.

Editor, www.somalilandlaw.com

January 2015

Dhammaystirka Xeerka Doorashada Goolaha Wakiilada

Waxaa soo diyaariyay

Gudida ku meel gaadhka ee Xeerka Doorashada

Hargeisa, December 2004

Tusmada Warbixinta

Tusmada Warbixinta.....	2
1. Hawl fulinta gudida oo kooban (Executive summary)	3
2. Araar.....	5
3. Saami qaybsiga Kuraasta Golaha Wakiilada	7
3.1 Dareenada ka dhashay xallin la'aanta Mushkilada Saami Qaybsiga Golaha Wakiilada iyo muddo korodhsiga.....	8
3.2 Sababaha abuuray Xallin la'aanta.....	9
4. Aragtiyaha kala duwan ee Golaha.....	9
4.2. Aragtida Labaad:.....	14
4.2.1 Shir beeledkii Borama.....	14
4.2.2 Shir beeledkii Hargeisa.....	15
5. Xal dhex u ah saddexda aragtiyood.....	20
6. Qaabka Doorasho	23
6.1 Qaabka Aqlabiyadda:	24
6.1.1 Goob Doorasho Qof keliya ah:	25
6.1.3 Gobol Doorasho:.....	26
6.2 Qaabka Saami wax ku qaybsiga (Proportional Representation).....	26
6.2.1 Liis xisbi (Party list system).....	27
6.3 Goa'anka gudida ee qaabka doorasho ee la qaadanayo.....	29
7. Kala xadaynta soohdimaha gobolada.....	30
7.1 Goa'aanka gudida ee kala xadaynta gobolada xilliga doorashada	31
8. Sixitaanka qaladaadkii ka soo baxay doorashooyinkii hore	32
9. Xeerka doorashada Golaha Wakiilada	33

1. Hawl fulinta gudida oo kooban

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane Axmed Maxamed Aden (Qaybe), ayaa magacaabay Gudida ku meel gaadhka ee dhammystirka xeerka doorashada Golaha Wakiilada, taariikhdu markay ahayd, 17kii November 2004. Gudidaasi oo ka kooban:

1. Mudane Cabdilqadir Xaaji Ismaciil (Jirdeh)
2. Mudane Maxamed Muuse Diiriye
3. Mudane Maxamed Warsame Diiriye
4. Mudane Maxmed Maxamuud Maxamed.
5. Mudane Cabdi Faarax Ducaale.

Gudiduna Waxay magacawday:

1. Xog-haye Guddi: Maxamed Xuseen Cismaan, oo ah xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada.
2. La taliye Guddi: Cabdirisaaq Caqli oo ah Cilmi baadhe madax banaan (Independent Researcher).

Gudida waxaa loo xilsaaray inay soo afjaraan saddex aragtiyood oo guddi hoosaadka arrimaha gudaha ee Golaha Wakiiladu u soo gudbiyeen Golaha Wakiilada. Waxaa kale oo loo xilsaaray inay soo dhammystiraan xeerka doorashada Golaha Wakiilada.

Waxay guddidu bilowday hawshaasi loo xilsaaray taariikhdu markay ahayd 19/11/2004. Fadhigoodi ugu horreeyay ee ay ku gudo gashay hawlahaasi loo xilsaaray, ayey soo hadal qaaday qodobkii ugu adkaa ee mudada badan ahaa carqaladda ugu weyn. Kaasoo ah saami qaybsiga kuraasta Golaha Wakiilada. Waxayna guddidu is tusaalaysay sooyaalkii mudada dheer kolba loo kordhinayey Golaha Wakiilada mudadii loo igmaday inay xilka hayaan iyo dareenada kala duwan ee ay arrintaasi ku abuurtay bulshada Somaliland. Waxaa kale oo guddidu is weydiisay sababaha abuuraya in aan xal loo helin mushkiladda saami qaybsiga kuraasta Golaha Wakiilada. Taasi oo laysla gartay inay sababaha ugu weyni yihiin tiro-koob la'aanta iyo aragtiyaha kala duwan ee Goluhu ka kala qabo habka kuraasta xubnaha Golaha la soo dooranayo loogu qaybinayo gobolada. Markii ay guddidu arrimahaasi isla gartay, ayay hoos ugu sii daadegtay inay falanqeyso saddexda aragtiyood ee Goluhu kala qabo. Taasoo ay guddidu isku dayday inay ogaato aragti walba halka ay salka ku hayso iyo meesha ay ka soo unkantay, iyadoo daba galaysa taariikhda aragti walba.

Intaasi ka dib waxay guddidu is tusaalaysay in aanay guddidani xal u heli karin mushkiladani inta uu qof walba oo gudida ka mid ahi rumaysanyahay, laabtana ku haysto, mid ka mid ah saddexda aragtiyood ee gudida horyaalla. Waxaana laysla gartay in saddexda aragtiyoodba meel dhexe layska taago si ay guddidu u kala xaq soori karto.

Waxaa kale oo ay is tusaalaysay, in haddii aragti keliya la qaato, ay keenayso taageerayaasha labada aragtiyood oo kale oo ka soo horjeedsada aragtida la qaatay. Taasoo ah mid hore Goluhu u soo arkay. Sidaasi awgeed waxaa gudida la gudboonaatay inay raadiyaan xal saddexda aragtiyood ee laysku hayo dhexdhexaad u noqon kara, si saddexda aragtiyoodba aanu midkoodna uga faramadhnaan xalka, ee aragti walba uga hesho sed go'an arrintan laysku hayo.

Waxay gudidu ka doodeen aragtida ugu habboon ee ay tahay inay gudidu doorato. Waxaa kale oo la isla soo hadal qaaday xal dhexe oon aragtiyaha midna u xaglin. Hase ahaatee marki danbe waxy gudidu ku heshiisay in arrinka saami qaybsiga dib loo dhigto oo marka ay hawlaha kale oo idili dhammaadaan la lafaguro.

Qaabka doorasho ee la isticmaali doono doorashada Golaha Wakiilada ayaa isna ahaa arrin aan weli hore meel laysla dhigin. Waxayna gudidu isku hawlisay sidii ay u ogaan lahayd qaabka doorasho ee ugu habboon maanta. Taasoo u baahatay in qaababka doorasho ee adduunka lagu isticmaalo, iyo noocyada uu mid walba ka koobanyahayba laga baaraan dego. Qaabka Aqlabiyadda (Majoritarian) iyo qaabka saami wax ku qaybsiga, (Proportional Representation), iyo noocyadooda kala duwan, ayey gudidu is garab dhigtay faaiidooyinka iyo dhibaatooyinka uu mid walba maanta u yeelan karo doorashada soo socota. Halkaasi oo ay qaadatay kii ay u aragtay inuu yahay ka ugu waxyeello yaraan kara.

Tiiyoo ay gudidu garawsatay in doorasho heer gobol ahi tahay ta maanta innogu fudud, ayey lagama maarmaan noqotay in soohdimaha gobolada xiliga doorashada si cad oo aan mugdi ku jirin loo qeexo. Waxayna gudidu u hawl gashay sidii ay u kala dooran lahayd shan marxaladood oo soohdimaha gobolada Somaliland soo mareen. Taasoo ay ogaatay in caddaymada ugu sugan loo heli karo soohdimihii kala xadayn jiray 6dii degmo ee Somaliland ka koobnayd 26 kii Juun 1960.

Intaasi ka dib ayey gudidu bilowday sidii loo dhammaystiri lahaa xeerka doorashada Golaha Wakiilada. Waxayna ka baaraan degtay xeerka doorasho ee L. 20/2001. Kaasoo hore loogu galay doorashooyinkii deegaanada iyo Madaxweynaha. Waxaana gudida u muuqday inay jiraan qodobbo aan u baahnayn in wax laga bedelo, qodobo kale oon gebi ahaanba doorashadan looga baahnayn, kuna habboon in laga saaro xeerkan iyo qaar u baahan in dib loo eego oo la saxo. Sidoo kale, waxaa lagama maarmaan noqday in qodobbo cusub lagu daro xeerkan kadib markii la arkay qaladaadkii doorashooyinkii hore, tiiyoo la tixgelinayo talo bixinadii laga soo bixiyay qaladaadkii doorashooyinkii hore.

Kadib markii ay gudidu qodob qodob u wada eegtay qoraalkii hore ee xeerkan, ayey soo saartay nuqulkii ugu horreeyay ee xeerkan 2dii bisha December. Waxayna gudida ugu muuqatay in talooyinka qoraalka ah ee laga soo bixiyay qaladaadkii hore uga dhacay doorashooyinkii la soo maray ay aad u yaryihiin. Sidaasi awgeed ayey lagama maarmaan u noqotay in lala tashado qaybaha kala duwan ee bulshada Somaliland ka

koobantahay. Taasoo ay guddidu kulanno talo bixin ah la yeelatay, Xukuumadda, saddexda xisbi Qaran, Gudida doorashada ee Qaranka, ururada haweenka iyo kuwa rayidka ah. Waxaana kulanadaasi ka soo baxay in loo baahanyahay in qaybahaasi oo idil loo qaybiyo nuqulka hore ee xeerkan doorasho si ay uga soo talo bixiyaan. Talooyin badan oo wax ku ool ah ayaa kulanadaasi iyo talobixinadiiba laga helay. Taasoo keentay in qodobo lagu kordhiyo xeerkan qaarna la tirtiro.

Waxaa kale oo qadarin mudan oo guddidu la yeelatay kulanno talo bixin ah Ruben Zamora oo ah Khabiir qaanunada, oo Golaha Wakiiladu ka codsaday Akaadamiyadda Nabadda iyo Horumarka inay u hawlagalaan sidii loo heli lahaa khabiir golaha ka taageera si loo sameeyo xeerka doorashada. Waxaana codsiyadii Akadamigu direen lagu guuleystay khabiirkaasi oo kharashka ku baxayana ay ku deeqday dawladda Ingiriisku. Kadibna Golaha Wakiilada ayaa Khabiirkaasi ku casuumay imaatinka Somaliland si uu ugala taliyo xeerka doorashada. Wuxuuna khabiirkaasi ka geestay xeerkan kaalin weyn isagoo qoraaladii koowaad iyo kii labaad (1st and 2nd draft) ee xeerkani soo maray ka bixiyay talooyin sixitaan iyo toosin qodobada qaarkood, isna waafajiyay xeerkan iyo distoorka.

2. Araar

31 Bishii May ee Sannadkii 2001 ayay dadweynaha Somaliland u codeeyeen distoorka Somaliland. Codayntaasina waxay u googol xaadhay in doorashooyin uu dadweynuhu ku dooranayo madaxdiisa ka hirgalaan Somaliland. Bishii Diisember ee sannadkii 2002 ayaa la qabtay doorashooyinkii deegaanada degmooyinka Somaliland. Waxaana saddexdii xisbi ee uga codka badnaa loo aqoonsaday xisbiyada qaranka ee ku tartamaya doorashooyinka Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada. Bishii April ee Sanadkii 2003, ayay hirgashay doorashadii Madaxweynahu. Weli se, waxay dadweynaha Somaliland, ee u codeeyay distoorku, ka sugayaan Golaha Wakiilada xeerkaa doorashada ee suurtoogelin lahaa tartan dhex mara saddexda xisbi qaran si ay dadweynuhu ugu kala codeeyaan loona doorto xildhibaano doorahso ku soo baxa.

Distoorka Somaliland ayaa qeexaya in qaab-dhismeedka Siyaasadeed ee Somaliland ka koobnaado Gole Fulineed, Gole Guurti iyo Gole Wakiillo. Labada Gole ee dambe waxay ka wada koobnaanayaan Golaha Baarlamaanka. Waxaana loo qoondeeyay in labada Gole, midkoodna noqodo mid hab-beeleed lagu soo xulo, ka kalena mid la soo doorto oo dadweynuhu u codeeyo iyagoo ka kala socda xisbiyada qaranka. Maantana labada Goleba waxay yihiin qaar hab-beeleed lagu soo xulay. Taasina waxay inoo muujinaysaa in distoorka Somaliland ee dadweynuhu u codeeyeen inuu ka hirgalo dalka, uu weli yahay mid kala dhantaalan oon weli dhamaystirmin, si buuxdana u wada hirgelin. Waxaa intaasi dheer in 3-da xisbi qaran ee siyaasiga ahi aanay kobci karin. Umana suurtoogelayso inay gutaan kaalintooda siyaasadeed, maadama aanay jirin xubno xisbiga metala oo dadweynuhu u codeeyeen oo uga dhex doodaya Golaha Wakiilada, iyagoo fulinaya barnaamijka siyaasadeed ee xisbiga. Waxaana hubaal ah in xaaladdan aynu ku

suganahay sii jirayso inta aanu Goluhu soo saarin sharciga doorashada. Kaasoo suurtoogelinaya tartan doorasho oo xisbiyada dhexmara.

Labadii doorasho ee dalka ka dhacay, waxay aad u bedeleen aragtii adduunku ka qabay Somaliland. Waxaana Somaliland loo arkay dal ku hawlan geedi socod dimoqraadiyad gudahooda ka soo biqishay. Taasoo qoraallo badan oo adduunka cidhifiyadiisa kala duwan ka soo baxay ay baahiyeen dimuqraadiyadda Somaliland ka socota, kuna baaqeen sidii looga gacan siin lahaa tijaabadaasi ay ku hawlan yihiin. Maantana haddii Goluhu soo saaro sharciga doorashada oo doorasho xisbiyadu ugu tartamayaan xubnaha Golaha Wakiiladu qabsoonto, waxaan shaki ku jirin in Somaliland loo arki mid dhammaystirtay dimoqraadiyaddii ku qeexnayd distoorka. Waxayna noqon tallaabo muujinaysa in distoorkii taabo galay.

Arrinka ugu weyn ee Golaha ka hortaagnaa inuu soo saaro sharciga doorashadu waa saami qaybsiga. Taas oo ah sida 82 xubnood ee la soo dooranayo loogu qaybinayo gobolada. Waana mid Golaha Wakiilada ogsoonyahay in carqaladda ugu weyn ee Goluhu u soo saari la'yahay sharciga doorasho ay tahay xallin la'aanta saami qaybsiga Golaha Wakiilada. Taas oo ah inaan xal loo helin, laguna heshiin, qaabka 82 kursi ee la soo dooranayo loogu qaybin lahaa gobolada.

Waxaana hubaal ah in kala qabsanaanta Golaha ee ay ugu wacantahay aragtiyaha kala duwan ee xubnuhu kala qabaan ay sii raajinayso xilligii doorashada Golaha Wakiiladu qabsoomi lahayd. Waxaana looga baahanyahay xubnaha Golaha inay xilliyaan mushkiladani mudada dheer soo jitamaysay. Taasina waxaa lagu gaadhi karaa tiyoo xubnuhu la yimaadaan tanaasul iyo grawsiiyo aragtiyaha ka soo horjeeda. Mana habboona in aragtida uu qofku rumaysanyhay uu u arko xaqiiqada dhabta ee qudha, oo uu ku dheganaado xataa tiyoo dalka seejinaysa himiladii la higsanayey. Aragtiiyahan kala duwan ee Goluhu qabaa waa mid ka dhalatay xaqiiqadii runta ahayd ee lagu kala bixi lahaa oo meesha ka maqan. Taasi oo ah tiyoo dalka uu weli ka maqanyahay tiro koob sugani. Waxaana Golaha la gudboon inay xoogga saaraan sidii loo heli lahaa xaqiiqo dhab ah oo wax lagu qaybiyo, ee maaha in lagu mashquulo aragtiyo kala duwan tiyoo sababtii aragtiyahaasi dhalisay ay meesha taallo.

Guddidu iyagoo ogsoon ahmiyadda ay xal u helidda arrintani u leedahay dalka Somaliland, ayay u hawlgaleen sidii ay xal ugu heli lahaayeen arrinkaasi iyagoo u dersaya si qotodheer oo dheelitiran. Waxaa kale oo ay guddidu soo doortay qaabka doorasho ee maanta innoogu habboon. Sidoo kale waxay guddidu xal u raadisay kala xadaynta gobolada xilliga doorashada. Ugu danbayn xeerkaa doorashada oo dhammaystiran ayey Golaha Wakiilada ugu soo gudbisay muddo afartan cisho ah marka laga bilaabo maalintii guddidu hawl gashay ee la magacaabay. Warbixintanina waxay sharxaysaa xeerka doorashada qodobadii ugu adkaa ee xubnaha Goluhu ku qaybsanaayeen, habkii loo diyaariyay, iyo tallaabooyinkii guddidu qaadeen mudadii ay hawsha ku guda jireen.

3. Saami qaybsiga Kuraasta Golaha Wakiilada

Muddo laba sano ka badan ayuu saami qaybsiga kuraasta Golaha wakiiladu ahaa carqaladda ugu weyn ee hortaagan in xeerka doorashada la soo saaro si doorasho xisbiyadu u tartamayaan ay u dhacdo. Mudadaasina Golaha Wakiiladu waxay ku guuldarraysteen inay xal u helaan mushkiladaasi.

Haddii aynu haddaba isweydiino sababaha muddadaasi dheer ka hortaagna Golaha Wakiilada inay xalliyaan mushkiladani, waxa inoo cadaanaya in la isku khilaafsanyahay sida loo qaybinayo 82 xubnood ee Golaha Wakiiladu ka koobanyahay. Waxaana laga sugayaa Golaha Wakiiladu inuu soo saaro sharciga doorashada ka hor inta aan doorasho qabsoomin. Waana in sharciga doorashadu qeexo qaabka doorasho iyo saami-qaysbiga Golaha Wakiilada. Taas oo ah in la qeexo sida 82 xubnood ee Golaha Wakiiladu ka koobanyahay loo soo dooranayo iyo meelaha laga soo kala dooranayo. Waana inay xeerka ku cadahay tirada xubnaha gobol walba laga soo dooranayo. Waxaana muuqata in saami qaybsigu yahay carqaladda ugu weyn ee Golaha Wakiiladu u soo saari la'yahay sharciga doorashada.

Xal u helid la'aantaasi waxay abuurtay in Golaha oo weli ah mid lagu soo dhisay hab beeleed inuu aragtiyo kala duwan ka yeesho qaabka kuraasta la soo dooranayo loogu qaybinayo gobolada. Taasoo abuurtay in xilliga la soo dooranayo Goluhu noqdo mid kolba dib loo dhigo.

Bilowgii khilaafkani wuxuu ka bilaabmay markii ay dawladdii Madaxweyne Maxamed Ibraahim Cigaal soo jeedisay in saamiga kuraasta loogu qaybinayo goboladu uu noqdo habkii sannadkii 1960 loogu qaybiyay. Markii doodaasi la hor keenay Golahana waxay abuurtay in beelaha qaarkood ay diidaan oo ka baxaan u codaynta soo jeedintaasi. Waxay taasi abuurtay in xeerkaa doorashada ee ay ahayd inuu doorashooyinka deegaanada, ka madaxweynaha iyo ka golahaba khuseeyo lagu koobo uun labada hore, doorashada xubnaha Golaha Wakiiladana dib loo dhigo. Waxaa taasi xigay in mar labaad hadana loo kordhiyay muddo laba sano ah si xal mudadaasi loogu helo khilaafka Golaha. Waxaase muuqata in khilaafkii sii kordhay oo ay abuurmeen aragtiyo kale oo is af garan waagiigii sii kordhiya. Xubnihii goluhuna waxay noqdeen qaar ku kala biira aragtiyahaasi kala duwan tiyoo qof walba doorbidayo ta gobolkiisa u sed kordhinaysa. Ilaa iyo maantana Goluhu ma keenin xal mushkiladani soo afjara. Waxaana hubaal ah in ay xallin la'aantaasi ay sii kordhinayso in xaaladda lagu suganyahay sii waarto, doorashaduna sii raagto, distoorkuna noqdo mid kala dhiman oon weli dhammaystirmin. Taasoo ah mid ka soo horjeeda yuhuuntii iyo himiladii dadweynaha Somaliland higsanayey.

3.1 Dareenada ka dhashay xallin la'aanta Mushkilada Saami Qaybsiga Golaha Wakiilada iyo muddo korodhsiga

Kordhinta mudadii loo igmaday Xubnaha Golaha Wakiiladu inay xilka hayaan waxaa ka dhashay dareenno kala duwan oo wajiyo badan, oo dadweynaha Somaliland qabo. Waxaana badi dareenadaasi sii xoojinaya, dadweynaha oon si buuxda uga warqabin sababaha dhaliyay korodhsiga mudada xubnaha loo igmaday inay xilka hayaan. Sidoo kale, aragtiyaha kala duwan ee xubnaha Goluhu ka qabaan saami qaybsiga, tanaasul yarida iyo ku dhegsanaanta aragtida uu qofku qabo, ayaa xubnihii Golaha ka qariyay inay raadiyaan xal dhexe oo fikiradaha kala duwan u wada cuntama, iskuna soo dhoweeya aragtidooda. Taasina waxay sii xoojisay, dareenadii ay dadweynuhu qabeen.

Haddii aynu dhowr tusaale ka soo qaadanno dareenadaasi, waxaa aad ugu xooggan dadweynaha, in mudaneyaashu door bidayaan in aan xal loo helin mushkiladda saami qaybsiga, si ay maarmarsiyo ugu helaan kordhisiga mudadii xilka loo igmaaday. Sidaasi awgeedna ay ogaan u abuurayaan in aanay fikraduhu isku soo dhowaan, kuna guubaabinayaan dadweynaha hadallo dadka sii kala fogaynaya oon isku soo dhawaynayn, oo tilmaamaya in wixii aan aragtidooda ahaynba tahay mid lagaga qaadayo sed uu Gobolkoodu xaq u lahaa, lana siinayo gobollo kale. Hadalladaasi, haddii ay jiraan, ma aha afkii laga filayey qof xildhibaan ah, ooy ahayd inuu dareemo in xilka uu hayaan ka dhigay mudane wakiil u ah dadweynaha Somaliland oo idil.

Weji kale oo dareenkaasi ahi wuxuu tilmaamaya in badi xildhibaanada Golaha ee maantun ay ogsoonyihiin in aan dadweynuhu soo dooranayn, xisbiyaduna aanay soo sharaxayn, oo ay doorashaduba tahay mid seejinaysa shaqadiisa iyo mushaharkiisa. Dad badan ayaa kulanada ka sheega: *“Xaggee ayaad ku aragtay qof ku dhaqaaqa inuu hirgeliyo arrin uu ogyahay in shaqo iyo xil uu jecelyahay ku waayayo”*. *“Waxaad doonaysaan, marka aad leedihiin, doorasho ha dhacdo, inay xildhibaanadu gacantooda ku saxeezan shaqo ka tagis oo ay baagamuundo noqdaan.”*

Dareen kale wuxuu rumaysan yahay in xildhibaanada qaar ka mid ah uu qaab beeleedku u sed kordhiyay, oo doorashadu ka dhimayso sedka uu hadda haysto. Taasoo isagoo ilaashanaya dantiisa shakhsiga ah uu iska dhigayo qof dantii beesha u halgamaya. Sidaasi awgeedna uu u hortaagan yahay inuu yimaaddo heshiis u horseedaya doorasho. Golahana ay ka dhex wadaan hawlo liddi ku ah sidii ay doorasho u qabsoomi lahayd.

Waxaa nasiib darro ah, in dadweynuhu ka qabo dareenadaasi oo kale, xildhibaanada oo helay fursad sanado badan, inay korodhsadaan waayo aragnimada habka Baarlamaanku u shaqeeyo, kana qayb galay tababaro, shirar aqoon kordhiso iyo xidhiidh shisheey, oo ay ahayd inay facaca soo koraya u gudbiyaan waayo-aragnimadooda, noqdaanna khabiirro la higsado oo tusaale u noqda bulshada Somaliland. Waana mid la ogsoon yahay in xildhibaan cusubi soo bilaabi doono jidkii dheeraa ee ay soo mareen, kuna bixi

doono kharash labaad oo la mid ah kii iyaga ku baxay si ay u korodhsadaan aqoonta iyo waayo-aragnimda habka Baarlamaanku u shaqeeyo.

3.2 Sababaha abuuray Xallin la'aanta

Sababta ugu weyn ee abuurtay khiaafkan fikradeed, ee laysku af garan la'yahay, waxaa muuqata inay tahay tiro koob la'aan. Waana mid hubaal ah, inta aanu jirin tiro-koob sugani, in aragtiyaha kala duwan ee laga qabo saami qaybsiga kuraasta Golaha Wakiiladu ay sii waarayaan. Waayo waxaa meesha ka maqan xaqiiqadii dhabta ahayd ee wax kala saari lahayd. Aragti kasta oo maanta lagu doodayaana waa mid kala dhiman oon ku qotomin xaqiiqo dhab ah oo wax kala saarta.

Sida la ogsoonyahay, doorashooyinka hufan ee adduunka oo idili waxay ku qotomaan tirokoob. Dalal badanina waxay soo saaraan sharciyo qasab ka dhigaya in dadka la tiro koobo ka hor inta aan doorasho la gelin, si kuraasta la soo dooranayo loogu qaybiyo gobolada iyo degmooyinka dalkaasi ka koobanyahay. Taasi oo dalal badani sameeyaan tiro koob ka hor inta aan doorasho la gelin, qaar kalena ay muddo go'aan (tobankii sanaba mar) ay ku sameeyaan tirokoob, haddii doorasho soo gashana la isticmaalo tiro-koobkii ugu danbeeyay.

Tiro koob la'aantaasina waxay abuurtay in marxaladihii dalku soo maray, mid ka mid ah hababkii la soo isticmaalay qof walba daliishado, isagoo door bidaya ta gobolkiisa u sed kordhinaysa. Taasoo uu mid waliba doonayo, in aragtidiisa la qaato, loona arko ta saxa ah ee maantana ay habboontahay in la isticmaalo. Taasina waxay dhalisay in Goluhu kala qaybsamo, oo uu noqdo mid aan marnaba arrinta saami qaybsiga ku heshiin karin. Waxayse arrintu ku habboonayd in la abbaaro sababta mushkiladani abuuraysa oo ah tiro koob la'aanta dalka ka jirta. Xubnaha Golahana waxaa la gudboonaa inay isku mushquuliyaan sidii tiro koob u hirgeli lahaa hadii ay doonayaan in mushkiladani xididada loo saaro. Taasi oo aan weli la arag xubno isku mashquulinaya halka ay doodaha aragtiyaha kala duwan in sababtani keentay laysku hawlinayo.

4. Aragtiyaha kala duwan ee Golaha

Gudidan waxaa waajibaadkeeda ka mid ahaa inay ka baaraan degaan saddexda aragtiyood, oo ay soo afjaraan mushkiladdan mudada dheer soo jiidamaysay. Taasoo ah in xubnaha Golaha Wakiiladu kala taageersanyihiin saddex aragtiyood oo kala duwan. Sadexdaasi aragtiyoodna waxay kala yihiin:

1. In saamiga tiradii kuraasta baarlamaanka ee sannadkii 1960 loogu qaybiyey 6 degmo ee dalku ka koobnaa, ay sal u noqoto sida maanta loo qaybinayo kuraasta Golaha ee la soo dooranayo.
2. In tirada maanta gobol waliba ku leeyahay Golaha Wakiilada ay sal u ahaato saamiga laga soo dooranayo Gobol walba.

3. In tirada doorashada codbixisaa u ahaato sal saamiga kuraasta xisbi walba iyo gobol walba ka helayo xubnaha la dooranayo.

Sadexda aragtiyoodba aynu, hoos ugu sii daadegno si ay innoogu muuqato halka ay aragti walba ku qotonto ee ay salka ku hayso. Waxaana lagama maarmaan ah in la daba galo taariikhda mid walba, si loo ogaado inay aragtidu tahay mid ku qotonta xaqiiqo dhab ah oo ay haboon tahay in maanta la isticmaalo iyo in kale.

4.1. Aragtida Kowaad

Bal haddaba si aynu u aragno xididada mushkiladani ka soo unkantay aynu dib ugu noqono taariikhda dhabta ah ee bilowgii doorashooyinka Somaliland. Ka dib markii Hawd iyo Reserve area uu ku wareejiyay Ingiriisku Boqortooyadii Itoobiya, ayuu abuurmay dhaqdhaqaaq xooggan oo dadweynaha Somaliland ku doonayaan madaxbannaani. Waxayna dawladdii Ingiriisku bilowday in Somaliland loo sameeyo Gole Sharci dejin (Legislative Council) oo ay xubno Somaliland ahi ku jiraan. Muddo ka badan labo sano ayay maamulkii ingiriiska iyo xafiiska gumaysiga ee London ka doodayeen qaabka loo gudo galayo hawlaha Golahaasi.

Ugu dambayn, sannadkii 1957, ayaa la sameeyay Gole Sharci dejin (Legislative Council) oo ka kooban lix xubnood oo Somaliland ah iyo 8 xubnood oo Ingiriis ah. Lixda xubnood ee Somaliland ahaa waxa magacaabay Badhasaabkii (Governor) ka talinayay Somaliland. Wuxuuna degmo kasta ka soo xulay hal qof. Taasi waxay abuurtay in beelo dhowr ahi ku doodeen in aanay Golaha beeshoodu ku jirin. Xisbiga SNL oo mucaarid ahaana wuxuu ku dooday in Goluhu yahay mid u adeegaya danaha gumaysiga, maadaama aanu dadweynuhu soo dooran xubnaha Golahaasi.

Arrintaasi waxay ku abuurtay Ingiriiskii ka talinayay Somaliland inay wax ka beddelaan qaabka Golaha loo sameeyay. Waxaana la qoondeeyay in la kordhiyo tirada Golaha oo laga dhigo 14 xubnood oo Somaliland ah iyo 17 Ingiriis ah. xubnaha somalilandna ay 12 xubnood noqdaan qaar la soo doorto, labada hadhayna uu badhasaabku magacaabo isagoo ku buuxinaya beelaha doorashada xubno uga soo bixi waayaan, si loo dheelitiro beelaha Somaliland ka koobantahay. Waxaana doorashada loo qoondeeyay bishii march ee sannadkii 1959-kii.

Waxaa la magacaabay guddi doorasho (commission of inquiry), oo ka soo talo bixisa qaabka ay doorashadaasi ku habboontahay, iyo habka 14 xubnood ee Somaliland loogu qaybinayo 6 da degmo ee dalku ka koobnaa, tiyoo la tixgelinayo sida xubnaha beelaha ka soo qayb gelaya layskugu dheelitirayo. Gudidaasi waxay ka koobnayd 3 qof oo Ingiriis ah iyo laba Somaaliland ah oo kala ah Maxamuud Axmed Cali, iyo Michael Mariano.

Waxa markaasi la qorsheeyay in la sameeyo diiwaan gelin lagama maarmaan u ah doorashooyinka hufan. Waxaana dhamaystirka hawlaha doorashooyinka loo qoondeeyay saddex marxaladood, oo kala aha sanadaha 1959, 1962, iyo 1965. Waxaana la bilaabay in magaalooyinka marxaladda hore loo qoondeeyay laga bilaabo diiwaangelin. Taas oo marka hore laga bilaabo Magaalooyinka Hargeysa, Burco iyo Berbera. Marxaladaha danbana magaalooyinka kale.

Hase ahaatee, Xisbiga SNL oo ka soo horjeeday doorashada Gole aanay Aqlabiyada laheyn dadka Somaliland, ayaa ku guubaabiyay dadweynihii in la qaadaco diiwaangelinta. Wuxuuna xisbigu faafiyay in qofkii is diiwaangeliya ay ooridiisu ka furmayso. Taasoo abuurtay in laga shakiyo diiwaan gelinta. Tiro ka yar saddex kun oo qof ayaa marxaladii koowaad is diiwaan gelisay oo doorashadii sanadkii 1959 ka codbixiyay magaalooyinka Hargeisa, Burco iyo Berbera. Dalka intiisa kale waxay doorashadu ku dhacday hab gacan taag ah.

Qorshaha siyaasadeed ee dawladdii Ingiriiska ee ka talinaysay Somaliland waxay ahayd in saddex marxaladood lagu dhammaystiri karo hawlaha la xidhiidha is maamulka oo dadka Somaliland si buuxda u hanan karaan inay dawlad iskood u maamulaan. Saddexdaasi marxaladood oo kala bilabmayey, 1959, 1962, iyo 1965, waxay noqdeen qaar aan taabbo gelin, oo dhexda ku baaba'a, waayo dadweynaha Somaliland ayaa aad ugu dheganaa in xornimada la siiyo sannadka 1960, oo aan dib loo dhigin, si ay ugu darsadaan Somaliya.

Ugu danbayn Ingiriisku inta uu iska laalaabay qorshihiisii ayuu aqbalay codsigii dadweynaha iyo xisbiyada siyaasiga ah. Wuxuuna magacaabay guddi doorasho kale oo ka kooban 4 Somaliland ah iyo hal qof oo Ingiriis ah, oo ka soo talo bixiya sidii ay doorasho Gole Somalidu aqlabiyada leeyihiin u qabsoomi lahayd. Waxayna kala ahaayeen gudidaasi:

1. Scawin,
2. Maxamed Ibrahim Cigaal,
3. Jirdeh Xuseen,
4. Ibrahim Aden,
5. Hasan Jama.

Guddiddasi doorasho waxay ku soo cago bixiyeen lixda degmo ee dalku ka koobnaa oo idil. Waxayna la kulmeen odayada degmooyinka, xisbiyada siyaasiga ah iyo ururada bulshada rayidka ah. Markii la weydiiyay tirade Somalida Golaha la soo dooranayo wuxuu xisbiga NUF soo jedyay 33 qof, xisbiga SYL-na wuxuu soo jeediyay 32 qof. Xisbiga SNL wuxuu soo jeediyay 47 qof. Waxayse markii dambe guddidu ku heshiisay 33 qof in laga soo doorto Somaliland. Markii la gudo galay habka doorashadu u dhacayso waxaa dalka laga diiwaan geliyay oo keliya saddexdii magaalo ee marxaladda hore ee diiwaan gelinta u qorshaysnaa.

Habka loogu qaybinayo 6da degmo 33 kursi kumay qotomin mid diiwaan gelin hore ama tiro koob ku salaysnayd, ee waxay ahayd mid ku qotonta qiyaas ay gaadheen shantii xubnood ee Guddiga doorashadu. Taas oo kadibna ay ogolaadeen Golahii sharci dejinta Somaliland, markii la horkeenay 22kii bishii July ee sannadkii 1958-kii. Wuxuuna maamulkii ingiriisku soo saaray sharci doorasho si doorashadu u qabsoomto 17ka bisha Febraury ee sanaddkii 1960-kii.

Naatijadii Doorashadii sannadkii 1960:

(Source: The Somaliland Protectorate Gazete, Vol XX, No. 11, Hargeisa, 27th February, 1960.)

Goob doorasho	Tirada codaysay	Tirada xubnaha
<u>1. Degmada Hargeisa</u>		
Dumbuluq	3834	1
Baanka	2892	1
Sheikh Madar	5603	1
Gebiley	6441	1
Faraweyneh	5441	1
Salaxlley	2437	1
Cadaadley	1615	1
Wadarta degmada Hargeisa	28263	7
<u>2. Degmada Burco</u>		
Masjid Jaamaca	3842	1
Sheikh Ismaaciil	1989	1
Laas dhuureh	2421	1
Duruqsi	2486	1
Goryaale	6375	1
Oodweyneh	-----	1
Wadarta degmada Burco	17113	6
<u>3. Degmada Berbera</u>		
Port	2538	1
Jaamalaayeh	3137	1
Bulaxaar	2159	1
Mandheera	1	214
Sheekh	1909	1
Wadarta degmada Berbera	10957	5
<u>4. Degmada Boorama</u>		
Magaalada Boorama	1285	1
Saylac	1228	1
Cabdilqaadir	1677	1
Boon	2892	1
Dila	3479	1
Wadarta degmada Boorama	10567	5

5. Degmada Ceerigaabo

Magaalada Ceerigaabo	1694	1
Xiis	1909	1
Laas Qorey	1206	1
Ceel Afweyn	3457	1
Jiidali	0937	1
Wadarta degmada Ceerigaabo	9203	5

6. Degmada Laascaanood

Caynabo	4198	1
Xudin	1074	1
Laascaanood	-----	1
Widhwidh	-----	1
Taleex	-----	1
Wadarta degmada Laascaanood	5272	5

Wadarta Somaliland ka codeysay: 81375

Waxaa doorashadii sannadkii 1960 la codeeyay tiyoo aan weli la dhamaystirin hawalaha diiwaangelinta iyo tirokoobka. Waxaana dalka oo idil ka codeeyay tiro ka yar 82 kun oo qof. Dhawr arrimood ayaa sababay in tirada codeysay aad u yaraato. Ta koowaad oo ah in ragga oo keliyi codeeyeen. Ta labaad oo ah in dalka oo idil laga codeeyay 150 goobood oo keliya. Ta sadexaad oo ah in 4 goob doorasho aan tartan ka dhicin oo aan laga codayn. Ta afraad oo ah in da'da codbixiyuhu ahayd qof ka weyn 18 sano.

Haddii aynu dib u eegno daldalooladii dhacay sannadkii 1960-kii ee aan lagu salayn diiwaangelin iyo tirokoob, waxaa inoo muuqanaya faraqa weyn ee u dhexeeya tirada ka codaysay goob doorashooyinkii hore gudidu u sii qoondaysay in mid walba laga soo doorto hal qof. Waayo, tusaale ahaan haddii aynu soo qaadano 33kii xubnood ee la soo doortay, waxa dalka Somaliland loo qaybiyay 33 goob- doorasho oo mid walba uu ka soo baxayey hal xubin oo la soo doortaa. Waxayna ku haboonaan lahayd in dalka loo qaybiyo 33 goob-doorasho oo is tiro leeg. Waayo tiyoo aanu diiwaangelintii u horseedi lahayd tirokoob aanu dhammystirmin, ayaa la go'aansaday in doorasho la galo. Gudidii doorashada ee la magacaabayna waxay hab qiyaas uun ku saleysan u qaybisay dalkii 33 goob-doorasho.

Marka dib loo eego tirada codbixiyayaasha goob-doorasho kasta waxa si cad u muuqanaya qaladka lagu saleeyay qaybintaasi. Doorashooyinkii ka dambeeyay ee sannadkii 1964-kii, iyo 1969-kii waxa sii socday uun qaladkii hore u dhacay oo aan dib loo sixin.

Dadka badanaa ka soo horjeeda aragtidan 1aad, ee diida in la soo hadal qaado qaybtii Lixdankii, waxay u badan yihiin kuwa u arka in la dulmay gobolka ama degmada ay ka soo jeedaan. Taasoo dad badani rumaysanyihiin in wixii maanta loo ogolaado si ku meel gaadh ah, aan dib loo sixi doonin ee laga dhigan doono wax rasmi ah, ama muddo dheer

jiitanta sidii horeba u soo dhacday. Waxaana suurto gal ah in dadkaasi diidan aragtida kowaad (1960), ay doorbidayaan labada aragtiyood ee kale ee Golaha la hor keenay. Hase ahaate, waa marxalad la soo maray dalkuna ku so dhaqmay, oo dad badani u arki karaan in si ku meel gaadh ah oo xadidan laga sii duulo, si marxaladan kala guurka ah looga gudbo.

4.2. Aragtida Labaad:

Qaabka lagu soo xulay xubnaha Golaha Wakiilada ee maanta jiraa, wuxuu ku salaysnaa hab beeled. Bal hadaba aynu aragtidan labaad ee ku qotonta hab beeled iyana lafa gurno. Wuxuuna habkani soo maray laba shir beeled oo ku kala dhacay Borama iyo Hargeisa.

4.2.1 Shir beeledkii Borama.

Shirkii Borama ee Sannadkii 1993 beelaha Somaliland oo idili ku heshiiyeen, ayaa aasaaka u qotomiyey in Golaha lagu soo xulo hab beeled. Waxaa shirkaasi lagu sameeyay, laguna ansixiyay Axdi Qarameedkii dalka lagu soo xukumayey mudadii u dhaxaysay sanadihii 1993-1997. Wuxuu Axdi Qarameedkaasi qeexay laba Gole, oo sharci dejin ah, oo kala ah Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada, oo mid walba tiradiisu tahay 75 mudane. Shir gudoonkii shirkaasi ayaa loo xilsaaray inuu maamulo xubnaha beeluhu u soo gudbiyaan. Beelaha shirayaana waxay ku heshiiyeen saamiga beel walba ku yeelanayso 75 kursi ee Goluhu ka koobnaan doono, inkastoo aanu beelaha qaarkood saluug badani ka madhnayn. Xubnihii shirka ka qayb galay, ee lahaa awood codayn ah kana koobnaa 150 qof waxaa dhammaantood loo aqoonsaday xubnihii Baarlamaanka Axdi Qarameedku ogolaaday. Waxaana loo kala qaybiyay labada Gole oo mid walba tiradiisu noqotay 75 qof. Hase ahaatee Beelaha ayaa markii danbe qaar bedelay. Waxaana muuqatay in markii hore aan xiiso weyn oo tartan keena loo hayn xubinimada Golaha.

Shir beeledkaasi Borama ka dhacay wuxuu ahaa mid si habsami ah, oon faragelin dawladeed ku jirin. Madax dhaqameedyada iyo odoyaduna waxay ku lahaayeen kaalin buuxda habka shirka loo qabanqaabiyay iyo qaabka uu u socday shirku. Qaabkii ay beeluhu u qaybsadeen 75 xubnood ee Goluhu ka koobnaana waa sida hoos ku qoran:

Tiradii Beelaha loogu qaybiyay 75 xubnood ee Golaha Wakiilad shirkii Boorama ee sannadkii 1993:

1. Habar jeclo	11
2. Gadabuursi	11
3. Dhulbahante	10
4. Habar Awal	8
5. Arab	7
6. Ciise	5

7. Ciidagale	5
8. Warsangeli	5
9. Habar yoonis	4
10. Cimraan	3
11. Ayuub	3
12. Tol-jecle	3
13. Dadka laga tiro badanyahay	0
Wadarta	75

(Source: Consolidation and Decentralization of Government institutons, APD, Hargeisa, Somaliland, July 2002)

4.2.2 Shir beeleedkii Hargeisa

Shir beeleedkii sannadkii 1997 ka dhacay Hargeisa wuxuu soo afjaray dagaaladii sokeeye ee dalka ka socday mudadii u dhaxaysay sanadihii 1994-1996. Wuxuuna shirkani sidii kii Boorama oo kale ku salaysnaa hab beeleed xubnaha shirka ka qayb gelaya lagu soo xulay. Waxaana shirkani ka soo qayb galay 350 xubnood oo ay ka mid yihiin 150 kii xubnood ee shirkii Boorama ka qayb galay. Hase ahaatee wuxuu shirkani kaga duwanaa kii ku qabsomay Borama, in ay dawlada Somaliland ku lahayd faro gelin xooggan.

Waxaaa shirkaasi dib loogu eegay cabashada beelo saluugsanaa tiradii loogu qoondeeyay shirkii Borame. Waxaa kale oo shirkani xubno cusub u ogolaaday beelaha laga tirada badanyahay oon hore xubinimo ku lahayn Baarlamaanka. Qaabka cusub ee uu shirkani wax ugu qaybiyay beelaha Somaliland waa sida hoos ku qoran:

Tiradii Beelaha loogu qaybiyay 82 xubnood ee Golaha Wakiilad shirkii Hargeysa ee sannadkii 1997¹

1. Habar jeclo	11
2. Gadabuursi	11
3. Dhulbahante	10 (<i>waxa ku jira tiridam mid Fiqishini ah</i>)
4. Habar Awal	08
5. Habar yoonis	07
6. Arab	07
7. Ciise	05

¹ Doorashadii Golaha markii ay dhacday sebtambar 2005kii, natiijadii xagaa beelaha xubnaha la doortay waxay noqotay ceynkan:

1. Habar jeclo	16	6. Arab	05	11. Ayuub	01
2. Gadabuursi	13	7. Ciise	01	12. Tol-jecle	0
3. Dhulbahante	06	8. Ciidagale	02	13. Dadka laga tiro badanyahay	0
4. Habar Awal	16	9. Warsangeli	04	14. Fiqishini	1
5. Habar yoonis	17	10. Cimraan	0	Wadarta	82

(Source: Academy for Peace & Development (2006) *A Vote for Peace*, Hargeisa, at page 44)

8. Ciidagale	05
9. Warsangeli	05
10. Cimraan	03
11. Ayuub	03
12. Tol-jecle	03
13. Dadka laga tiro badanyahay	04
Wadarta	82

(Source: Consolidation and Decentralization of Government institutons, APD, Hargeisa, Somaliland, July 2002)

Qaabka ay beeluhu u soo xuleen xubnaha Golaha way kala geddisnaayeen. Manay jirin dariiqo cad oo la wada raaci karo. Sida la ogsoonyahay, marka hab beeled wax lagu soo xulayo, dadka ku abtirsada beeshaasi oo idili kama talo bixiyaan, ee waxaa badi hawsha, beerigii hore, loo dayn jiray odayada ugu waayo aragnimada badan. Waxaase shirkii ugu danbeeyay ka muuqday, in odayada dawladdu ogoshahay ee beeshaasi kaalinta ugu xooggan ee xulashada la wareegeen.

Si kasta arrinku ha ahaadee xubnihii Golaha ee hab beeledka lagu soo xulay waxay ahaayeen kuwo u xilsaaran sharci dejinta dalka. Wuxuuna distoorku siiyay awoodo ay ka mid yihiin inay ansixiyaan wasiirada iyo madaxda laamaha dawladda. Sidoo kale inay ansixiyaan barnaamijyada dawladdu ku shaqaynayso, heshiisyada caalamiga ah`ee ku saabsan siyaasadda, dhaqaalaha iyo nabad gelyadaba. Sidoo kale Baarlamaanka oo isku jira ayaa dawladda u oggolaanaya in dalka la geliyo xaalad degdeg ah. Waxayna mudadaasi qabteen hawlo badan oo ay ugu muhimsan yihiin ka qayb qaadashada distoorka, iyo hirgelinta sharciyada xisbiyada, doorashada, dhaqaalaha iwm.

Waxaa xusid mudan, guud ahaan, in ay dadkii ku soo barbaaray barashada aqoonta shisheeyuhu, ay dhowr iyo tobankii sano ee ugu danbeeyay korodhsadeen barashada bulshadooda, dhaqankooda, iyo qaab dhismeedka beelahaba. Kuwaasi oo xilliyadii hore ay aad ugu yarayd aqoonta ay u leeyihiin bulshada, dhaqanka iyo beelaha Somalilandba. Waayo mudadii yaraanta ee ay ku soo barbaari lahaayeen barashada dhaqankooda, waxay ku jireen dugsiyo ay ku baranayaan aqoon shisheeye.

Sida la ogsoonyahay, xubnaha Golaha Wakiilada waxaa laga soo xulay dad ku soo barbaaray barrashada aqoon shisheeye. Taasoo distoorku qeexay in qofka Golaha Wakiilada xubin ka noqon karaa uu haysto ugu yaraan shahaado dugsi sare. Xubnihii Goluhuna waxay fursad u heleen, maadaama lagu soo xulay hab beeled, inay korodhsadaan aqoonta qaab dhismeedka beelaha Somaliland. Taasoo yeelan karta weji waxtar iyo mid waxyeelaba. Sidoo kale waxaa kobcay aqoontii xubnaha ee dhaqanka iyo bulshada Somaliland.

Aqoon korodhsigaasina waa mid ka dhashay ka qayb galka shirarkii nabadaynta beelaha, shirarkii aayo ka talinta Somaliland iyo shirar kale oo ku saabsanaa xallinta

arrimaha bulshada. Waxaana si joogto ah dalka uga socday doodo kala duwan oo ku saabsan bulshada iyo dalkaba. Taasoo xubnuhu si joogta ah uga qayb qaadanayeen. Sidoo kale doodihii Golaha ka dhex socday ayaa u kordhiyay codkar nimo. Taasoo ay dareemaan dadweynaha Somaliland ee dalalka shisheeyaha ku nooli marka ay soo booqdaan xubno ka tirsan Goluhu oo ay yidhaadaan. 'Waar hebel muxuu af dilaacsaday'. Waxaa intaasi dheer, in xubinimadii Goluhu awoodsiisay korodhsi aqoonta habka Baarlamaanku u shaqeeyo. Taasoo qofkii dedaalay ee hawlaha golaha ka socday isku mashquuliyay uu ka helay waayo aragnimo weyn oo la xidhiidha habka Baarlamaanku uga hawl gali karo bulshada Somaliland oo dhaqan ahaan u hawl geli jirtay qaab ka duwan habkan laga soo dheegtay dhaqan kale oo shisheeye ah. Waxaana suurto gal ah in xildhibaanada qaarkood ay ka midho dhaliyeen iswaafajinta labadaasi aqoonood ee ka soo kala jeeda laba dhaqan oo kala duwan, iyagoo dhaqan walba ka soo qaatay arrimaha bulshada Somaliland faaiidada u leh.

Marxaladdan kala guurka, ee laga gudbayo habkii beelaha ee Golaha Wakiilada, waxaa muuqata in loo bislaaday in laga gudbo hab beeleedkii xubnaha lagu soo xuli jiray. Aragtidan labaad ee xubno ka tirsan Golaha Wakiiladu soo jeediyeen ee ah in doorashada lagu saleeyo tirada maanta gobol walba ku leeyhay golaha, waa tallaabo hore looga soo qaaday halkii hore la taagnaa ee ahayd in hab beeleed lagu soo xulo xubnaha.

Tiiyoo taasi jirto, waxaa hadaba isweydiin mudan in qaabkani uu noqon karo mid ku qotoma xaqiiqo dhab ah oo gobolada wax loogu qaybiyo. Waxaa hubaal ah in xubnaha Goluhu ay ku salaysanyihiin qaab hab beeleed ah. Taasoo beeluhu ku heshiiyeen sidii loo qaybsan lahaa xubnaha Golaha. Hase ahaatee marka ay arrintu noqoto in xubnaha loo qaybiyo gobolada, waxaa inoo caddaanaya in aan xubnaha hore loogu qaybsan gobol gobol ee loo qaybsaday beel beel. Taasoo inoo muujinaysa in gobolka iyo beeshu yihiin laba kala duwan, oo midna ay tahay in hab beeleed lagu soo xulo, ka kalena in gobolka laga soo doorto xubno cayiman oo laysla ogyahay. Doorashaduna waxay u baahan tahay in marka hore la ogyahay tirada gobol walba ka koobanyahay oo ah xaqiiqo lagu heli kara uun tiro koob sugan. Hase ahaatee tiyoo aanu Somaliland ka jirin tiro koob sugan oo gobolada wax loogu qaybin karo ayey aragtidani u muuqataa mid xubnaha qaarkood u arkeen in ay sal u ahaato sida gobolada wax loogu qaybinayo. Waxayna u badantahay in xubnaha Golaha ee aragtidani soo jeediyay ama taagersani ay u arkaan mid gobolka ay ka soo jeedaan uga sed kordhinaysa aragtida kale ee sannadkii lixdankii ku qotonta.

4.3. Aragtida Sadexaad:

Aragtida sadexaad waxay tilamaamaysaa in tirada codbixiyaasha doorashada Golaha Wakiilada loogu qaybiyo saamiga uu xisbi kasta iyo gobol kastaa ka helo tirada guud ee codka la bixiyay. Taasi waxay inoo muujinaysaa in tiro go'an oo gobolada loo sii cayimayo oo u baahan in marka hore laga sii heshiiyo oo laysla af-garto inaan loo baahnayn. Waxaa se gobolada iyo xisbiyadaba wax loogu qaybinayaa naatiijada soo

baxda oo gobol walba ka helayo inta gobolkaasi ka codaysay, sida xisbi walbana wax u helayo kolba inta u codaysay.

Aragtidani waxay u muuqataa mid cadaaladda u dhow oo xisbi kasta iyo gobol kasta helayo saamigii uu xaqa u lahaa marka tirada codadka guud ee Qaranka la xisaabiyo. Qaybinta habkaasi oo kale ahina waa mid aad loo isticmaalo oo dadka wax ugu qaybinaysa hadba inta uu xaqa u leeyahay ee uu saamigiisu siiyay. Qaabkanina waa mid aad loo isticmaalo marka wax loo qaybinayo xisbiyada tartamaya. Sidoo kale waa habka tirokoobka iyo diiwaangelintuba ugu qaybiyaan gobolada kuraasta loo tartamayo. Habka ay aragtidani wax u qaybinayso waa mid u muuqata in aanay cidina ku eedaynayn xaq soor la'aan, cid walbana u qoondaynaysa wixii uu xaqa u lahaa. Waxaadna moodaa in habka tirokoobka iyo qaabka doorasho ee saami wax u qaybsiga (PR) laga soo dheegtay aragtidani.

Laakiin haddii aynu muuqaalkaasi guud hoos uga sii daadegno, waxaa inoo muuqanaya dhibaatooyinka ay aragtidani keeni karto. Waxaana inoo cadaanaya meelaha ay aragtidani ka khilaafsantahay hababkii laga soo dheegtay ee qaabkaasi wax u qaybiya. Haddii aynu ku horrayno habka tiro koobka ee ay aragtidani iskaga mid yihiin qaabka wax loo qaybinayo, waxaa hubaal ah in tirokoobka iyo cod bixintu ay aad u kala duwan yihiin. Mid walbana leeyahay duruufo u gaar ah, oo uu ku suurto galo. Tiro koobu wuxuu leeyahay duruufo daraasad, cilmi baadhis, xaqiijin, dabagal, u fiirsasho iwm, oo muddo dheer qaata si xaqiiqada dhabta ah loo helo. Tirada tiro koobkuna waxay soo baxdaa ka dib markay xannibaadyo badan oo kala duwan soo dhaafto.

Doorashadu se waxay leedahay duruufo aad uga duwan kuwa tiro-koobku leeyaahay. Doorashadu waa tartan dhex maraya xisbiyada siyaasiga oo ay u kala dheeraynayaan sidii ay u kasbi lahaayeen codadka ugu badan ee dadweynaha. Tartankuna wuxuu keenaa xammaasad gooniya oo aad looga shaqaysiiyo caadifadda, tiyoo guubaabo, dacaayad, iyo qiiraba la isticmaalayo. Ujeedada ugu weyn ee tartankani doonayaana waa in uu helo tirada ugu badan ee codadka.

Waxaa laga yaabaa in dadka aragtidani soo jeediyay, ay raadinayaan cadaalad dadka oo idili u sinnaado oo si siman wax loogu qaybiyo. Gobol walba iyo xisbi walbana helo wixii uu xaqa u lahaa. Laakiin aragtidani waxay keenaysaa in xisbiyada iyo goboladuba tartan u tafaxaytaan. Doorashadan Golaha Wakiiladana waxaa loogu talo galay tartan dhex mara xisbiyada ee looguma talo gelin tartan dhex mara gobolada. Aragtidani se waxay keenaysaa tartan kale oo goboladu ugu tartamaan kuraasta Golaha. Gobol kastaana wuxuu u tafo xaydan sidii uu kuraasta u badsan lahaa. Tartankaasi oo abbaari doona sidii uu codadka gobolka u badsado, si ay kuraastu ugu badato.

Tartankaasi ma bilabmayo uun marka ay codbixintu bilaabanto, ee xaataa marka waraaqaha codbixinta loo kala dirayo gobolada ayuu gobol walba ku doodi in waraaqaha loo badiyo, tiro isleegna gobolada oo idil loo kala diro, halkii gudida doorashadu ay hore ugu qoondayn jirtay gobol walba tirada codbixiyaasha laga filayey.

Doorashooyinka dalka ilaa hadda ka dhacayna kuma qotomaan xanibaadyo kala hufid iyo baadhis ku qotoma. Khadka gacmaha loo mariyo dadka codeeyay ayaa ugu weyn tabaha aynu isticmaalno, ee aynu ugu talo galnay in khiyaamada lagu yareeyo. Waxaana inoo muujinaya in aanay codaynta weli ka madhnayn ku noqnoqosho naatiijooyinkii ka soo baxay doorashooyinkii aynu soo marnay.

Aragtidani waa tii ugu danbaysay ee taageerayaasheedu soo gaadhsiiyaan Golaha. Waxayna u egtahay in aragtidani ay unkantay ka dib markii la arkay natiijooyinkii labadii doorasho ee dhawaan dalku soo maray. Taasoo gobolada qaarkood ay dareemeen farabadnaanta codbixiyaashooda. Lana dareemay gobollo ay aad ugu yaryihiin dadkii ka codbixiyay.

Bal aynu hadaba yara eegno natiijooyinkii labadii doorasho² ee dalka dhowaan ka qabsoomay -

Natiijadii Doorashadii Deegaanada 2002

Gobolka	codka la bixiyay	codka xumaaday	codka ansaxay
1. Hargeisa	193109	6726	186383
2. Awdal	103012	2517	100495
3. Togdheer	68083	1485	66598
4. Sanaag	55194	2098	53096
5. Saaxil	28090	856	27234
6. Sool	6420	159	6261

(Source: Gudida doorashooyinka Qaranka, December 2002.)

Natiijadii Doorashadii Madaxweynaha.

Gobolka	codka la bixiyay	codka xumaaday	codka ansaxay
1. Hargeisa	213,956	5,096	208,864
2. Togdheer	116,046	982	115,064
3. Awdal	68,396	2,466	65,930
4. Sanaag	58,781	843	57,938
5. Saaxil	31,128	591	30,537

² Labadaa doorashu ka dib ilaa hadda (2014) waxaa dalka ka qabsoomay saddex (3) kale oo cododkii la bixiyay (kuwii ansaxay iyo kuwii xumaadayba) gobol kasta ay ahaayeen sidan:

Doorashooyinkii la qabtay 2005, 2010 & 2012						
ALL VOTES (Valid & Invalid) CAST IN EACH REGION						
AWDAL	HARGEYSA	SAAXIL	SANAAG	SOOL	TOGDHEER	Wadar
2005 Doorashadii Golaha Wakiilada						
133,777	255,979	52,695	89,823	20,756	121,877	674,907
2010 Doorashadii Madaxweynaha						
81,399	236,651	29,211	58,515	20,878	111,653	538,247
2012 Doorashooyinkii Goleyaasha Deegaanada						
115,320	318,746	58,086	115,800	49,681	162,527	820,160

(Source: Gudida doorashooyinka Qaranka 2005, 2010 & 2012)

6.Caynabo	9,785	83	9,702
7. Heer Qaran	547	39	508
Wadar	498,639	10,096	488,543

(Source: Gudida doorashooyinka Qaranka, April 2003.)

Haddii aynu eegno natiijada labadaasi doorasho waxaa inoo muuqanaya isbedel weyn oo u dhexeeya tirada doorasho kasta uga codaysay gobolada qaar kood. Waxaa kale oo inoo muuqda in gobolka Hargeisa oo ay caasimaddu ku taallo ay ka codeeyeen tiro aad u badan. Waana arrin jirta in dad aad u badani sanadihii danbe u soo guureen Hargeisa iyagoo ka yimid goboladii ay hore u deganaayeen. Taasoo arrimo badani ku kellifayaan. Haddii hadaba aragtidan la qaato oo tartan dhex maro gobolada maxay doorashadu keeni kartaa?

Ilaa iyo maanta qofka waxaa lagu tiriyaa gobolkii uu asal ahaan ka soo jeeday ee beeshiisu degto xataa isagoo tobanaan sano degenaa gobol kale. Musharixiintana waxaynu doorashooyinka oo idil ku qoondaynay musharrax walba halkii ay beeshiisu degto. Tiiyoo aragtida dadkeena taasi tahay, hadaba, natiijada codbixinta aynu wax ku qaybinaynaa ma inoo sheegi karta dadka gobolada kale ka yimid ee ka codeeyay caasimadda oo ah meesha tirada ugu badani u soo guurtay marka gobolada loo eego? Mise waxaa la gudboon qof walba inuu ka codeeyo gobolkii uu ka soo jeeday si codkiisu ugu tirsanaado gobolkiisa?

Su'aalahaasi waa qaar uu ka jawaabi karo tiro koobku, hase ahaatee aragtidani kama muuqato inay jawaab u heli karto. Guud ahaan, uma muuqato mid toosan in gobolada tartan loo geliyo sidii xisbiyada oo kale. Taasoo ay ka soo bixi karaan arrimo aynaan maanta filayn, laakiinse innagu keeni kara wax khal khal geliya doorashada aynu higsanaynno oo idil.

5. Xal dhex u ah saddexda aragtiyood

Waxaa inoo muuqan kara in khilaafkan fikradeed, ee abuuray in saami qaybsiga kuraasta Golaha Wakiilada laga kala qabo aragtiyo kala duwan, ay sabab u tahay tiro-koob la'aanta dalka ka jirta. Taasoo aanay jirin tiro sugan oo gobolada wax loogu qaybiyo. Saddexda aragtiyoodna kuma jirto mid keliya oo ka tarjumaysa xaqiiqada dhabta ah ee gobolada wax loogu qaybin karo. Mid waliba oo saddexda aragtiyood ka mid ahina waxay leedahay, sida ku cad faahfaahinta saddexda aragtiyood ee kor ku xusan, dhaliilo, iyo daldaloollo. Suurto galna maaha in mushkiladani loo helo xal kama danbays ah ilaa tiro koob sugani dalka ka hirgalo. Aragtiyahaasi kala duwanina way jirayaan inta aan tiro koob sugan la helin.

Haddii hadaba aynnu ogaannay halka uu salka ku hayo khilaafkan abuuray aragtiyaha kala duwan ee laga qabo saami qaybsiga kuraasta Golaha Wakiilada, waxaa innala

gudboon uun inaynu kala dooranno laba arrimood . Ta hore oo ah inaynu doorashada dib u dhigno oo la sameeyo tiro koob wax lagu qaybiyo. Ta labaad oo ah in immika xal ku meel gaadh ah oo ku eg uun mudada doorashadan oo keliya la raadiyo, doorashadana la qabto waqtigii loo xadiday, tirokoobkana lagu dedaalo sidii uu dhakhso ugu qabsoomi lahaa si doorashada danbe aanu khilaafkan inna hadheeyay u saamayn. Haddii aynu ta hore ee ah dib u dhigista doorashada ku horrynno, waxaynu bilwogii warbixinta ka soo warrannay sooyaalkii dib u dhigista waqtigii loo igmaday inay Golaha Wakiiladu xilka hayaan. Waxaa kale oo aynnu warbixintan kaga soo warrannay dareenadii ka dhashay dib u dhiggaasi. Waana mid la ogsoonyahay in dadweynuhu aad ugu dulqaatay go'aanadii dib u dhigista ahaa. Dadweynaha Somalilandna waxay maanta ka filayaan Golaha inuu soo saaro xeerii doorasho ee mudada badan laga sugayay. Waxaa intaasi dheer tiyoo Xukuumadda iyo Gudida doorashaduba xadideen xilliga doorashada oo loo qoondeeyay 29 Bisha March, ee sannadka 2005.

Sidaasi awgeed, waxay ta hore ee ah in dib loo dhigo doorashadu, u muuqataa mid caqliga saliimka ah aad uga fog, kana soo horjeeda yuhuunta dadweynaha Somaliland iyo go'aanadii ay ku dhawaaqeen Madaxweynaha Somaliland iyo Gudida doorashooyinku ee lagu xadiday xilliga doorashadu qabsoomayso.

Waxaa markaasi innala gudboon inaynu raadinno xal ku meel gaadh ah oo ku eg uun doorashadani, loona sii gogol dhigo tilmaamihii lagu samayn lahaa tirokoob. Si hadaba loo helo xal ku meel gaadh ah, waxaa inoo cad in mushkiladani aan xal loo heli karin inta uu qof walba oo Golaha ka mid ahi doonayo in aragtidiisa la qaato. Waxaa kale oo xusid mudan in qaybsanaanta xubnaha goluhuu sii qaybin doonto uun dadweynaha Somaliland.

Oday dhaqameedka Somaliland waxay aad ugu xeeldheer yihiin habka mashaakilka loo xaliyo, loogana dhex abuurto nabad beelo hore colaadi uga dhaxaysay. Taasoo ay qoraallo badan ku cadeeyeen aqoonyahanno shisheeya ah oo kala duwani. Hase ahaatee arrintani saami qaybsigu waa mid ku saabsan doorasho, oo laga soo dheegtay dhaqan kale oo odayadu aanay aqoonteeda lahayn. Waxaana la filayey in xildhibaanada Golaha Wakiiladu ka faaiidaystaan waanaagga labada dhaqanba ku dhex jira. Haddii aynu is weydiinno habka dhaqanka Somaliland wax u xalliyo marka arrin saddex geesood iska soo horjeedaa ku timaaddo, ee dhinac walba uu sheeganayo inuu xaq ku taaganyahay. Jawaabta su'aashaasi, oo laga bartay oday ku caanbaxay dhaqanka Somaliland, waxay inoo sheegaysaa in dhaqanka Somaliland aanu dadka arrin isku haya aanu saddexdaba midkoodna fara madhnaan dirin, ee lagu dedaalo sidii mid walba looga siin lahaa sed uu ku qanco arrinkaasi laysku hayo.

Waxaana halkaasi innoga muuqanaya in Goluhu baalmari jirey xal bulshada Somaliland hore ugu dhaqmi jirtay. Taasoo, markii hore Goluhu isku dayi jirey in aragtiyaha laysku hayo mid uun la qaato, xooggana la saari jiray in dadka aragtida kale rumaysan lagu qanciyo inay aragtidan ay diidanaayihin aqbalaan. Waxaana halkaasi ka muuqata in weli xildhibaanada Goluhu u baahanyihin in ay dhaqankooda ka bartaan odayada.

Gudidu, iyadoo ogsoon muhiimada ay xal u raadinta mushkiladani u leedahay dhammaystirka doorashooyinka Somaliland, ayey ku dedaaleen sidii ay u heli lahaayeen xal ku meel gaadh ah oo saddexda aragtiyoodba u cuntami kara, tiiyoo saddexda aragtiyood aan midna loo xaglinaynin ee meel dhexe layska taagayo. Ugu horreyn, aragtida sadexaad ee ahayd in natiijada codaynta ka soo baxda doorashada sal looga dhigo saamiga xisbi walba iyo gobol walba qaaybtiisa ku helayo, kama muuqato tiro go'an oo ay hadda wax ugu qaybinayso gobolada. Labada aragtiyood ee kalana waxay muujinayaan tiro go'an oo gobol walba loo cayimayo. Hase ahaatee aragtidani waxay wax ku qaybinaysaa habka gobolada wax loogu qaybiyo marka tirokoob la haysto. Waxaana muuqata dhibaata ka iman karta gobolada oo tartan gala, sida xisbiyada oo kale, marka doorashadu dhacayso. Taasoo arrimo badan oo lama filaan ahi ka soo dhex bixi karaan.

Waxay gudida ugu muuqatay in aragtidani tahay mid aan maanta si cad wax ugu qaybinayn gobolada ee habkeedu ku xidhanyahay tirada gobol walba ka codaysa. Taasoo gobol walba xaqiisa ku heli karo. Hase ahaatee, dhibaatooyinka ka iman kara haddii aragtidani la qaato, oo aynu kor ku soo sheegnay, ayaan maanta lagu talin karin in aragtidaani la qaato. Waxaa se sed u noqon kara aragtidani, in habkeedaa wax lagu qaybiyo wixii doorashadan ka danbeeya marka tiro koob suurto galo. Mudadaasina la sii diyaariyo habkii tiro koob hufani u dhici lahaa, loona hawl geli lahaa sidii uu u suurto geli lahaa. Taaso loo baahanyahay in gudidu ku cadeyso xeerkan doorashada tilmaamihii u gundhigi lahaa tirokoob dhakso ah.

Markaasi ka dib, waxaa gudida la gudboonaatay inay guda gasho habkii labada aragtiyood ee kale loo dhexdhexaadin lahaa loona kala xaqsoori lahaa. Waxayna gudidu isla af garatay in labada aragtiyoodba meel dhexe layska taago. Taas oo ah in tirada xubnaha labada aragtiyood siinayaan gobol walba laysku geeyo, ka dibna laba loo qaybiyo si loo helo tirada dhex dhexaadka ah.

Si arrintaasi u suurto gasho, waxaa marka hore lagama maarmaan noqday in la ogaado tirada xubnaha ee aragti walba u qoondaysay gobol walba. Markii la soo qaaday aragtida koowaad ee ku salaysnayd habkii sannadkii lixdankii, waxaa muuqday in tirada kuraastii lixdankii ahayd 33 kursi, kuwa maantuna 82 kursi. Sidaasi awgeed waxaa lagama maarmaan noqday in kuraasta gobol walba lahaa sannadkii lixdankii lagu dhufto 2.5. Taasoo markii la xisaabiyay jajab aan xubin noqon karini ka soo hadhay gobolada qaarkood.

Gobolka Tirada xubnaha 1960 Tirada xubnaha X2.5

Hargeisa	7	17.5
Togdheer	6	15
Awdal	5	12.5
Sanaag	5	12.5
Sool	5	12.5

Saaxil	5	12.5
Wadar	33	82

Sidoo kale markii aragtida labaad ee hab beeledka ku qotontayna la goboleeyay waxaa muuqatay in shanta xubnood ee gudida ahi qof walba u arkay si gooniya tirada gobolada aragtidani u qoondaysay. Taasoo ay ugu wacan tahay beelaha qaarkood oo gobollo dhawar ah dega, qofkiina loo arki karo mid ka soo jeeda gobollo kala duwan.

Gobolka Tirada xubnaha oo gobolysan

Hargeisa	24
Togdheer	14-16
Awdal	16
Sanaag	11-12
Sool	10-11
Saaxil	6
Wadar	82

Sidaasi awgeed, ayey lagama maarmaan u noqotay in shanta xubnood ee gudida ahi mid waliba gooni ahaantii u xisaabiyo tirada xubnaha ee gobol walba ka helayo tirada isugeynta dhex dhexaadka ah. Markaasi ka dib ayaa laysku geeyey tiradii xubin kasta oo gudida ahi u aragtay in gobol walba heli karo. Halkaasi oo ay ka soo baxday tiro dhex dhexaad ah oo isugeyntii ka soo baxday. Waxayna tiradaasi gobol walba helay noqotay sida soo socota:

Gobolka Tirada xubnaha aragtida dhexe

Hargeisa	20
Togdheer	15
Awdal	14
Sanaag	12
Sool	11
Saaxil	10
Wadar	82

6. Qaabka Doorasho

Waxay gudidu guda gashay inay kala doorto qaababka doorashada ka ugu habboon maanta, tiyoo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah ee maanta ka jira Somaliland. Si arrinkaasu u suurtagalo, waxaa lagama maarmaan noqday in qaab walba la ogaado faaiidooyinka iyo khasaaraha uu leeyahay, lana ogaado saamaynta uu mid walba ku yeelan karo Bulshada Somaliland.

Qaababka doorashooyinka ee dalalka adduunku ku dhaqmaan guud ahaan waa laba qaybood oo kala ah:

- Qaabka Aqlabiyadda (Majoritarian),
- Qaabka saami wax ku qaybsiga (proportional Representation).

Mid walba oo qaababkaasi ka mid ahi wuxuu u sii kala qaybsamaa noocyo badan oo kala duwan, oo dal waliba ku qoondeey duruufihiisa gaarka u ah bulshadiisa. Waxa kale oo jira in labada qaab ee aynu kor ku soo xusnay mararka qaarkood laysku dhafo, taasoo lagu tilmaamo Qaabka doorashada isku jirka ah (Mixed). Labada qaab doorashaba dalku hore ayuu u soo arkay.

Gudidu waxay hoos ugu daadagtay labada Qaab doorashaba, tiyoo noocyada kala duwan ee uu qaab walba ka koobanyaahay la sii guda galay. Bal aynnu ku horraynno waxyaabihii ka soo baxay Qaabka Aqlabiyadda (Majoritarian).

6.1 Qaabka Aqlabiyadda:

Waxaa badi habkani ku dhaqma dalalka xidhiidh taariikheed la lahaa dalka Ingiriiska. Waxayna xisbiyadu ugu tartamaan habkani si toos ah oo midkood uun ku guulaysanayo goob walba. Taasoo xisbiga tiro bataa uu qaato kursiga loo tartamayo. Waana habkii doorasho ee Somaliland ku dhaqantay labaddii doorasho ee sannadihii 1959, 1960 dalka ka dhacay.

Waxaana lagu tilmaamaa in uu yahay qaabka ugu sahlan uguna fudud in ay dadweynaha codaynaya fahmaan. Hase ahaatee hawl aan yarayn ayaa dusha ka fuusha masuuliyiinta u xil saran hawlaha doorashooyinka, ha ahaato xukuumadda dhexe, Golaha wakiilada iyo guddida doorashooyinka. Taasoo u baahan muddo dheer in la sii qorsheeyo hawlihii lagama maarmaan u ahaa si uu qaabkani u hirgalo.

Waxaana badi lagu tilmaamaa in uu qaabkani suurtagelinayo awood ay dadweynaha codbixinayaa si cad oo aan mugdi lahayn ku kala doortaan qofka ay iyagu doonayaan. Taasoo keliifta in xisbigu doondoonto qof dadweynaha goobtaasi raali ka yahay. Waana mid keenta in dadweynuhu la xisaabtami karaan qofkii ay doorteen, suurto gelinaysana in qofka ku guulaysta doorashadu uu ku dedaalo sidii halkii laga soo doortay wax ugu qaban lahaa inta uu xilka hayo.

Khasaaraha uu qaabkani leeyahay waxaa gudida uga soo baxay tiyoo dad badan oo cod bixiyay uu codkoodu khasaarayo, waayo xisbiga ugu codbata ayaa qaadanaya kuraasta goobtaasi lagu tartamayey. Waxaa kale oo muuqatay in aanu xisbina helayn kuraas u dhiganta saamiga dadkii u codeeyay. Taaso, dalku hore u soo arkay sannadkii 1960, markii xisbigii NUF uu helay hal kursi oo keliya, tiyoo hadana uu xisbi keliyi ka tiro badnaa marka lays garab dhigo tirada afartii xisbi ee tartamayey uga codaysay dalka Somaliland oo idil.

Intaasi ka dib ayey gudidu hoos ugu daadegtay noocyada kala duwan ee uu Qaabkani ka koobanyahay. Waxaana muuqatay in badi qaabkani laba nooc loo kala isticmaalo. Labadaasi nooc oo kala ah:

- Goob doorasho qof keliya ah (Single member constituency).
- Degmo doorasho dhowr qof ah (Multi member constituency).

Mid walba oo labadaasi nooc ah, waxay gudidu u lafa gurtay gooni ahaan. Waxaana uga soo baxay:

6.1.1 Goob Doorasho Qof keliya ah:

Goob-Doorasho qof keliya ahi waa noocii dadka Somaliland u codbixiyeen sannadihii 1959, iyo 1960. Taasoo ah in Xisbi kasta oo tartamayaa uu Goob-doorasho kasta soo dhigayo Musharrax keliya. Halkaasina loo kala codaynayo musharaxiintii uu xisbi kastaa soo sharraxay. Hadaba, ka hor inta aan doorashadu dhicin, ayuu qaabkani u baahan yahay in dalka loo qaybiyo inta ay kolba yihiin kuraasta la soo dooranayo.

Tusaale ahaan, haddii aynu Somaliland iyo Golaha Wakiiladda tusaale u soo qaadanno, waa in Somaliland loo qaybiyo 82 Goob-doorasho oo is tiro le'eg. Taasina waxaa lagama maarmaan u ah, in ka hor intaan dorasho dhichin la sameeyo tiro-koob. Sidoo kale, in la sameeyo soohdimaha kala xadeeya 82 Goob-doorasho. Taasoo abuuraysa soohdimaha doorashada uun loogu talo galay oo ka duwan soohdimaha maamulka ee jira. Waxaa taasi ka daran in mar kasta oo doorasho la gelayaba loo baahanayo tiro koob hor leh iyo soohdimaha cusub. Wuxuuna isbeddelkan joogtada ahi aburayaa soohdimaha aan joogto ahayn oo doorasho kasta laga yaabo inay isbeddelaan, kadib marka tiro-koobka la helo. Waxaana loo gudbay in sidoo kale la lafa guro, nooca labaad ee qaabkan Aqlabiyaddu leeyahay.

6.1.2 Degmo Doorasho dhawr qof ah:

Noocan labaad ee ah degmo doorasho dhowr qof ahi (multi-member constituency), wuxuu tartanka xisbiyadu si toos ah uga dhacayaa degmooyinka, tiyoo uu xisbi waliba ka soo sharraxayo degmo kasta dadkii tartanka uga qayb geli lahaa. Soohdimaha degmooyinka tartanku ka dhacayaana waxay la mid noqonayaan soohdimaha degmooyinka. Noocani uma baahna isbeddel joogto ah oo lagu sameeyo soohdimaha degmo doorashooyinka. Waxayna badi soohdimaha noocani la mid noqdaan soohdimaha degmooyinka ee maamulka. Tartanka xisbiyaduna waxay ka dhacayaan degmooyinka oo xisbiga ugu tiro bata marka la tiriyo codbixinta uu wada yeelanayo kuraasta degmadaasi oo idil.

Noocan waxaa lagama maarmaan u ah in tiro koob la sameeyo, ka hor inta aanay doorashadu qabsoomin, si loo ogaado musharaxiinta degmo kastaa xaq u yeelanayso tiyoo lagu salaynayo tiro koobka degmo kasta. Tirada degmada oo isbeddeshaan ma keenayso in isbeddel lagu sameeyo soohdinta degmada. Hase ahaatee, waxaa suurto gal ah haddii tirada degmaddu badato ama yaraato in isbeddel ku dhaco xubnaha laga soo dooran karo.

Faa'iidooyinka ugu waaweyn ee noocani leeyahay waxa lagu tilmaamaa tiyoo dadweynaha codeeyey ee degmadaasi ay helayaan qof degmadaasi laga soo doortay oo ay la xisaabtami karaan. Waxayna xisbiyada ku qasabtaa in ay doontaan qof degmadaasi magac ku leh. Sidoo kale noocani wuxuu faaiido u leeyahay dadka laga tirada badan yahay. Waxaa intaasi dheer, dalalka dhiirigelinaya in ay haweenku ka mid noqdaan xubnaha la soo dooranayo ayuu noocani u sahli karaa hab lagu soo doorto.

Markii gudidu hoos ugu daadegtay dhaliilaha qaabkani leeyahay, waxaa si cad ugu muuqatay, inuu saamayn ku yeelan karo tirada la soo doortay oo aad uga duwanaan karta tirada xisbiyada u kala codaysay. Waayo, degmo kasta waxaa kuraastii wada qaadanaya xisbiga ugu cod bata xataa haddii uu hal qof oo keliya dheeraado xisbiga ku xiga. Waxaynaa xisbiyadii kale noqonayaan qaar ka faramadhan degmadaasi xataa haddi tiro aad u badani u codaysay. Qaran ahaan, wuxuu nocani ku xun yahay, tirada xisbi kasta uga codaysay dalka oo idil, iyo kuraasta mushariixiinta uu ku guulaystay ayaad u kala duwanaan karta.

Waxaa intaasi dheer, in Somaliland oo xisbiyada Qaranku yihiin saddex xisbi oo keliya, uu habkani suurto galin karo in laba xisbi u heshiiyaan xisbiga kale oo ay isku daystaan degmooyinka ay labadaasi xisbi ee heshiiyay iska sharraxayaan si looga cod badato xisbiga loo tashaday.

Dhaliisha ugu weyn ee meesha ka soo baxday waxay noqotay tiyoo aanu dalka ka jirin tiro-koob sugan oo degmooyinka wax loogu qaybiyo. Taasina waxay keeni karta muran hor leh oo ka daran kii hore laysku hayay ee ahaa sida loogu heshiinayo inta uu gobol walba kuraasta ka helayo. Waxaa intaasi sii dheer tiyoo degmooyin badani ay weli ku muransanyihiin soohdimaha, iyo xilliga yar ee ka hadhay mudadii loo xadiday doorashada, ayaa hadana murankii uu ku soo siyaadayaa muran kale oo lagu murmo tirada kuraasta degmo kasta loo cayimay.

6.1.3 Gobol Doorasho:

Waxaa talooyinkii loo soo jeediyay gudida ka mid ahaa in qaabka doorasho ee Aqlibiyadda lagu isticmaalo heer gobol. Taasoo ah in xisbi kastaa liiska mushariixiinta uu ka soo sharraxayo gobol kasta loo codeeyo, oo xisbigii ugu tiro bataa uu qaato kuraasta oo idil. Taasina waxay ugu muuqatay gudida mid siiba kordhisay dhaliilihii qaabkani lahaa ee aynu kor ku soo sheegnay.

6.2 Qaabka Saami wax ku qaybsiga (Proportional Representation)

Gudidu markii ay ka faro xalatay qaabkii doorasho ee Aqlibiyadda ayay u soo jeedsatay gudagalkii qaabka kale ee Saami wax ku qaybsiga. Waxaana u fiirsashadii qaabkani uga soo baxay arrimaha soo socda.

Qaabka doorasho ee saami wax ku qaybsiga (PR), waxa lagu tilmaama inuu yahay ka isticmaalkiisu ugu badanyahay dalalka reer galbeedka ee ku caan baxay

doorashooyinka. Wuxuuna habkani doorasho ugu qaybiyaa kuraasta xisbiyada dorashada ku tartamaya, hadba saamiga uu xisbigaasi ka helo tirada codadka. Taas oo ah, in xisbi kasta loo xisaabiyo tirada codaynta uu ka helay degmo dorashadaasi, ka dibna la xisaabiyo saamiga kuraasta ee u dhiganta codayntii uu xisbigu helay. Waxayna arrintaasi inoo muujinaysaa in tirada kuraasta degmo/gobol doorasho kastaa ka badantahay hal kursi.

Soohdimaha kala xadeeya degmo/gobol doorashooyinkuna waxay badanaa la mid noqdaan soohdimaha maamul ee jira. Taasina waa mid u sahlaya qaabkani in si fudud uu uga hirgeli karo Somaliland.

Habkani doorasho wuxuu abuuraa xisbiyo farobadan oo tartanka ka soo qaybgala. Taas oo keenta inay adkaato xisbi keli ahaantii aqlabiyad uu dawlad ku soo dhiso hela. Sidaasi awgeed ayaa qaabkani loo arkaa mid dhiirigelinaya isbahaysiga laba ama dhowr xisbi. Taas oo dalalka qaarkood ku keenta xasilooni daro dawladeed oo si dhakhso ah loo bedbedelo. Hase ahaatee waxaad moodaa in mushkiladaasi uu soo koobay distoorka Somaliland, inkastoo aan la wada tirtirin, markii lagu qeexay in xisbiyada qaranku aanay ka badnaan karin saddex xisbi.

Guud ahaan, qaabka doorasho ee saami wax ku qaybsigu wuxuu u fiicanyahay xisbiyada badan ee higsanaya inay doorashada ka qayb galaan, xubnana ku yeeshaan dadka la soo dooranayo. Haddii aynu eegno sida uu qaabkani u saamayn karo bulshadda Somaliland, waxa inoo muuqan kara in la kala garan waayo xubnihii ay u codeeyeen dadweynuhu. Taasoo lagu tilmaamo in dadweynuhu u codeynayaan xisbiga ee aanay u codaynayn musharixiinta Tiiyoo liiska ay dad badaan oo kala duwani ku jiraan, dadweynaha codeeyayna uma suurto gelayso inay helaan musharrax go'an oo ay la xisaabtamaan. Dhinacca kale, waxaa gudida si cad ugu muuqataqy in uu qaabkani doorasho siinayo xaqsoor fiican saddexda xisbi ee tartamaya. Taasoo xisbi waliba helayo saami leeg dadweynihii u codeeyay. Waxayna xisbiyada kuraastoodu ku xidhantahay hadba inta qof ee u codaysay.

Waxay sharaxaasi guud ka dib, gudidu sii dhex maquuratay noocyada kala duwan ee uu qaabkani u qaybsamo, waxaan ka soo baxay arimaha hoos ku qoran. Noocyada kala duwan ee uu qaabkani u kala baxo, guud ahaan, waxay gudidu aad u gudo gashay inay kala doorto labada nooc ee ugu dhawaan kara in laga hirgalin karo bulshada Somaliland. labadaasi nooc oo kala ah:

- Liis xisbi (Party list)
- Lis xisbi qofka la calaamadinayo

6.2.1 Liis xisbi (Party list system)

Taariikh ahaan wuxuu noocani ka bilaabmay dalka Somaliland doorashadii sannadkii 1964. Taas oo qaabkii doorasho ee Somaliland ku soo dhaqantay sannadihii 1959, 1960,

la bedelay lana qaatay qaabkii doorasho ee soomaaliya hore uga dhaxashay Talyaaniga. Sidoo kale, waxa qaabkani doorasho lagu soo dhaqmay doorashooyinkii baarlamaanka ee sannadkii 1969, iyo dhawaan doorashadii deegaanada ee la qabtay bishii Disambar ee sannadkii 2002. Sidaasi awgeed ayaa qaabkani lagu tilmaami karaa inuu yahay ka isticmaalkiisu ugu badanyahay dalka Somaliland, markii dib loo eego mudadii doorashaba ka dhacdo dalka.

Sida la ogsoonyahay wuxuu xisbi kastaa degmo/gobol doorasho walba dhigayaa liis caddaynaya xubnaha u sharaxan xilkaasi la dooranayo. Dadweynaha codbixiyaayaana waxay kala doortaan liisaska xisbiyadu soo qadimeen. Taas oo uu cod bixiyuhu calaamadiyo xisbiga uu door bidayo. Waxaana suurto gal ah inuu qaarna garanayo qaarna aanu garanayn. Waxa taasi kaga sii daran in liiska laga yaabo inay ku wada jiraan qof uu rabo inuu doorto iyo qof aanu rabin inuu codkiisa siiyo. laakiin noocani wuxuu qasab kaga dhigayaa inuu liisaska xisbiyada mid uun qaato. Taas oo lagu tilmaamo in awoodii xoriyada doorashadu kala dhantaalantahay. Waxaana codbixiyaasha ku dhaca jahowareer marka natiijada doorashadu cadaato ee uu qofku ogaado, sida marar badan dhacday, in codkiisii uu ku soo baxay qof kale oo aanu isagu u codeeyeen.

Waxaa kale oo noocani liis xisbi lagu tilmaamaa inuu awood dheeraada siinayo madaxda xisbiyada siyaasiga ah ee tartamay. Waayo hoggaamiyayaasha xisbiga ayaa go'aaminaya sida ay murashixiintu liiska ugu kala horeeyaan. Taas oo suurto gelinaysa qofka u dhow guusha iyo ka aad uga fog. Waayo musharixiinta liiska ugu horreeya ayaa uga dhow guusha musharixiinta ugu danbeeya. Waxayna taasi muujinaysaa inay hoggaamiyayaasha xisbigu awooddii kala doorashada ka qaadeen dadweynaha oo ay iyagu la codeeyeen cidda soo baxaysa.

Haddii aynu dhinaca kale ka eegno, wuxuu qaabkani kobciyaa dhismaha xisbiyada. Waxaana abuurma kala danbeyn xisbiga loo hogaansamo. Musharixiinta guulaystaana waxay noqonayaan qaar maqla talada xisbiga ka dib marka la doorto haddi ay rajo ka qabaan in xisbigu doorashada danbe soo sharraxo. Awood xooggan ayuu xisbigu ku yeelanayaa doorashada, maadaama ay guusha musharraxu ku xidhantahay halka uu liiska xisbiga kaga jiro.

Noocani wuxuu yahay ka dadweynaha Somaliland ugu isticmaalka badnaa, marka la eego inta doorasho ee laga qayb galay. Waana nooc ay ka muuqatay in xammaasadda xisbigu ka kor maro xamaasadda beelaha. Waayo dad badan oo kala beel ah ayaa liis keliya oo xisbiga ku wada jira. Taasina waxay xoojinaysaa dhismihii iyo kobcii xisbiyada siyaasiga ah. Marka loo eego dadweynaha Somaliland, waa nooc u fudud oo aan dhibaatooyin wax kala garan waa ah ku abuurayn marka la codaynayo.

6.2.2 Liis xisbi qof la calaamadinayo

Markii ay qaada dhigtay guddidu nooca liis xisbi ee qaabkan doorasho ee aynu ku jirno, ayay hoos ugu daadegtay noocii kale ee liis xisbi qof la calaamadinayo. Waxaana gudida u muuqatay:

Dalalka qaarkood ayay dhibaataada liiska xisbigu taabatay oo ku fekiray hab wax looga bedelo qaabkani. Taas oo loo bedelay in qofka codaynayaa uu liiska xisbigu soo qoray uu qofka uu doono ka calaamadiyo. Waxayna arrintani siinaysaa dadweynaha awood ay wax ku kala doortaan. Waxaa kale oo ay arrintani xisbiga ku qasbaysaa in uu liiska ku soo daro dad magac ku leh goobta lagu tartamayo. Taasina waxay kor u qaadaa tayada dadka xisbigu soo sharaxayo.

Habkani wuxuu abuuraa tartan xisbiga dhexdiisa ka dhaca. Waayo musharixiinta xisbigu soo qadimay ayey qaarna tiro badan oo dad u codeeyay ah helayaan, qaarna dad yari u codaynayaan. Taasina waxay kala saaraysaa laba qof oo isku xisbi ahaa, in doorashadu kala saarto.

Waxaa kale oo musharixiinta xisbiyada oo idil uu qaabkani ku kala saarayaa tirada codka uu helay musharrax kastaa, xisbiga uu doono ha ku jiree. Halkaasina waxaa ka soo caddaanaya inta musharrax ee xisbi kastaa ku guulaystay.

Dhibaataada ugu weyn, ee guddidu isla aragtay in hirgelinta noocani ku adkaan karto Somaliland , waxay noqotay tiyoo dad badan oo reer Somaliland ahi aanay waxna akhriyi karin waxna qori karin. Sidaasi awgeedna aanu qofku calaamadin karin musharraxa uu doonayo. Markii guddidu isla eegtay hadii ay jiraan dhincyo kale oo mushkiladani looga wareegi karo, waxaa la soo jeediyay laba tusaale: Ta hore oo ah in musharixiinta xisbigaasi sawiradooda lagu dhejiyo warqadda codaynta, markaasina uu qofka wax dooranayaa ka calaamadiyo qofka uu doonayo. Taasi waxay u muuqatay in ay kharash badan iyo muddo dheer oo dadka laga dhaadhiciyo u baahan doonto. Waxaa intaasi ku kordhay, marka ay saddexda xisbiba keenaan liis dheer oo sawiro ah, waxaa gudida u muuqatay in ay dad badani kala garan waayaan sawiradani badan.

Tusaalaha labaad wuxuu soo jeediyay in qofka loo calaamadiyo. Taasina waxay guddidu u aragtay in doorashadii qarsoodiga ahayd meesha ka baxayso. Weliba waxa suurto gal ah in dad badan uu qofka uu codbixiyuhu u doortay inuu u calaamadiyo, in uu khiyaameeyo oo isagu ra'yi ka duwan aaminsan yahay.

6.3 Goa'anka gudida ee qaabka doorasho ee la qaadanayo

Kadib markii ay guddidu aad uga baaraan degtay labada qaab doorasho ee badanaa adduunku isticmaalo, noocyadooda kala duwannna ay hoos ugu sii fiirsatay, waxaa gudida si cad ugu muuqday in labbada nooc ee qaabka doorasho ee Aqlabiyaddu, aanay ka suurto geli karin maanta dalka Somaliland. Sababta ugu weyn ee aan qaabkani loo qaadan karina waa tiyoo aanu dalku lahayn tiro-koob sugan oo goobaha doorashada

ama degmooyinka doorashada wax loogu qaybiyo. Tiyoo muddo dheer Golaha Wakiiladu ku heshiin waayeen habka loogu qaybinayo, haddii aynu ku soo kordhinno mushkilad kale oo dhex marta degmooyinka ama goobaha doorashada waxaa dalka oo idili ku mushquuli muran joogto aha oo doorashadaba dib u dhigi karta.

Waxaa intaasi sii dheer, tiyoo uu weli muran ka taaganyahy Soohdimaha Gobolada iyo degmooyinka, haddii hadana lagu soo kordhiyo soohdimimo cusub oo kala xadeeya goob doorashooyinka amd degmmo doorashooyinka, oo aan weliba ta goob doorashadu joogto ahayn ee marka doorasho dhacaysaba bedelmi karta, waxay taasi u horseedi kartaa muran hor leh. Waxaana suurto gal ah in ay rabshado iyo dagaallo abuurto. Sidaasi awgeed, waxay si wada jir ah u go'aansadeen, iskuna wada raaceen in qaabka doorasho ee aqlabiyaddu suurto gal ahayn, marka la eego mudada yar ee ka hadhay doorashada.

Dhinaaca kale, markii ay gudidu aragtay nooca la baad ee qaabka wax ku qaybsiga ee ahaa liis xisbi qof la calaamadinayo, waxay gudidu isla aragtay in hirgelinta noocani ku adkaan karto Somaliland, waxaana sababaya tiyoo dad badan oo reer Somaliland ahi aanay waxna akhriyi karin waxna qori karin. Sidaasi awgeedna aanu qofku calaamin karin musharraxa uu doonayo. Haddii laysku dayo in sawiradooda lagu dhejiyo warqadda codaynta, markaasina uu qofka wax dooranayaa ka calaamadiyo qofka uu doonayo, taasi laf ahaanteedada dad badan ayaa isku khaldi kara kalana garanwaayi doona sawirada badan ee hal warqad ku wada sawiran. Haddii laysku dayi lahaa in qofka loo calaamadiyo waxay gudidu u aragtay in doorashadii qarsoodiga ahayd meesha ka baxayso. Weliba waxa suurto gal ah in dad badan uu qofka uu codbixiyuhu u doortay inuu u calaamadiyo, in uu khiyaameeyo oo isagu ra'yi ka duwan aaminsan yahay. Sidaasi awgeed waxaa gudida ugu muuqatay innoocani aanu maanta ku habboonayn bulshada Somaliland.

Gudidu markii ay is garab dhigtaay qaababka doorashooyinka iyo noocyadooda kala duwan , waxay isla garatay in qaabka doorasho ee saami wax ku qaybsiga noociisa lagu magacaabo liis xisbi uu maanta yahay ka ugu habboon.

7. Kala xadaynta soohdimaha gobolada

Soohdimaha kala xadeeya gobolada Somaliland waxay soo mareen marxalado dhowr ah oo kala duwan. Taasina waxay abuurtay in qof walba si gooniya u arko halka soohdimaha goboladu marayaan. Si hadaba sawirka dhabta ahi inoogu cadaado, waxaa lagama maarmaan ah in aynnu dib u yara jaleecno taariikhdiisii marxaladahaasi kala duwan.

1. Marxaladda koowaad waxay ahayd xilligii dalka Somaliland uu ka talinayey Ingiriisku. Waxayna dawladdii Ingiriiska ee ka talinaysay maxmiyadda Somaliland dalka u qaybisay lix maamul degmo. Soohdimaha degmooyinkuna waxay ahaayeen qaar maamul. Soohdimahaasi may ahayn kuwo beeleed ee

waxay ahaayeen kuwo maamulka loogu talo galay. Waxaana muujinta soohdimahaasi lagu cadeeyay khariidado hab fiican sheegaya halka ay soohdintaasi marayso. Wuxuuna dalka Somaliland qaatay xornimadiisii 26 June ee sannadkii 1960 iyadoo dalka Somaliland leeyahay lix degmo oo soohdimahoodu ku qeexan yihiin khariidado la sameeyay sanadihii 1956,1958. Kuwaasi oo ay si cadaan ah oo aan muran ku u muujinaya meelaha ay soohdimahaasi marayaan.

2. Marxaladda labaad waxay ahayd markii Somaliland ku darsatay Somalia 1dii July ee sannadkii 1960. Waxaana markaasi labadii dal ee isku darsaday abuureen dal keliya oo lagu magacaabo Jamhuuriyadda Somaalida. Markaasina dalkii hore loo odhan jiray Somaliland waxaa laga sameeyay laba gobol, laguna kala magacaabay Waqooyi Galbeed iyo Waqooyi Bari. Soohdimaha labadaasi gobol way ka duwanaayeen soohdimihii 6da degmo. Waxaana degmooyinkii hore u jiray, oo leh soohdimo cusub, la kala raaciyay labadaasi gobol ee cusub.
3. Marxaladda Sadexaad waxay bilaabantay sannadkii 1972 xilligii xukunkii Siyaad Barre. Waxaana la sameeyay gobolka cusub ee Sanaag oo soohdin cusub oo ka duwan xuduudii degmadii Ceerigaabo lahaan jirtay loo sameeyay. Waxaa kale oo isla markaasi la sameeyay gobolka Nugaal oo magaalo madaxdiisu tahay Garowe, degmadii Laascaanood inteeda badanina ka tirsantahay gobolkaasi Nugaal.
4. Marxaladda Afraad waxay ahayd sannadkii 1986, xilligii xukunkii Siyaad Barre, oo la sameeyay laba gobol oo kale. Kuwaasi oo kala ah gobolka Awdal iyo gobolka Sool. Mid walba oo labadaasi gobol ahi wuxuu yeeshay soohdimo hor leh oo ka duwan kuwii hore u lahaayeen degmooyinkii Boorama iyo Laascaanood.
5. Marxaladda ugu danbeysayna waxay ahayd sannadkii 1995, xilligii uu dalka Somaliland ka talinayey Madexweyne Mohamed Ibrahim Cigaal. Waxaana la sameeyay gobolka cusub ee Saaxil, oo leh soohdimo cusub oo ay xuduudihiisu ka wada duwanyihiin kuwii hore degmada Berberi u soo martay oo idil.

7.1 Goa'aanka gudida ee kala xadaynta gobolada xilliga doorashada

Gudidu waxay garowsatay in marxaladahaasi kala duwani jahowareer, ismaandhaaf, iyo shaki badan ku abuuri karto bulshada Somaliland. Waxaana xilliga doorashada loo baahanyahay in aragti midaysan laga yeesho goobaha soohdimahaasi marayaan. Waxaana lagama maarmaan in marxalad keliya, oo marxaladahaasi dalku soo maray ka mid ah, la doorto.

Ilaa iyo mudadii Somaliland ku dhawaaqday la soo noqoshada madaxbanaanideeda, waxaa jiray g'aanno badan oo sheegaya in soohdimaha gobalada maanta kala xadeeyaa ay noqdaan soohdimihii kala xadaynayay degmooyinkii Somaliland 26 June ee sannadkii 1960.

Gudiduna markii ay marxalad walba goonideeda u eegtay, waxay ugu muuqatay in marxaladda koowaad ee xilligii Ingiriisku ka talinayey tahay, ta ugu haboon in xilliga doorashada la isticmaalo. Waayo waxaa loo heli karaa khariidado aan cidina ka been sheegi karin oo lagu ilaaliyo goobo lagu hayo khariidadaha adduunka oo idil. Sidaasi awgeed ayay guddidu gabi ahaantood isla waafaqeen oo ay go'aansadeen in soohdimaha kala xadaynaya gobolada xilliga doorashadu, ay noqdaan soohdimihii kala xadaynayey degmooyinkii Somaliland, 26 Juun ee sannadkii 1960.

Guddidu iyagoo adeegsanaya hawl fududaynta teknoolojiga casriga iyo adeegyada cilmi baadhisayada waxay daba gashay wixii khariidado ah ee xilligii Ingiriisku ka talinayey laga hayo Somaliland. Waxayna ka sii dooratay kuwa muujinaya soohdimihii kala xadaynayey 6dii degmo ee Somaliland ka koobnayd. Khariidadahaasi xilliyadii ugu danbeeyay la sameeyay, ee muujinaya soohdimaha maamulka lixdii degmo ee Somaliland ka koobnayd, waxaa la sameeyay sannadihii 1956, 1959. Faahfaainta khariidadahaasi iyo cinwaanka meesha laga helayo, waa kuwa hoos ku qoran si komishanka doorashada iyo ciddii kale ee u baahataaba u raadsato:

<p>Subject: British Somaliland, Maps</p> <p>Document type: Map; Government Publication</p> <p>Main Author: Great Britain, Directorate of Colonial Surveys</p> <p>Title Details: Somaliland Protectorate Series: D.C.S. 983 (Great Britain, Directorate of Overseas Surveys)</p> <p>Edition: 1st edition</p> <p>Scale: 1: 2,500,000</p> <p>Publisher: (Tolwerth, England) Directorate of Colonial Surveys, 1956</p> <p>Physical description: 1 Map : col; 19 x 37 cm</p> <p>Note: Shows: International and administrative boundaries, railways, roads (2 categories)</p> <p>Location: London, British Library, St Pancras, Map library; Maps 177.b.2.(39.)</p>	<p>Subject: British Somaliland, Maps</p> <p>Document Type: Map</p> <p>Main Author: Great Britain. Directorate of Overseas Surveys</p> <p>Title Details Somaliland Protectorate Series: D.O.S. ; 339 (Y823)</p> <p>Scale: 1:25,000</p> <p>Publisher: { Tolworth} Directorate of Overseas Surveys, 1959</p> <p>Physical description: Maps; sizes vary</p> <p>Note: Shows: grid, Roads,(3 categories), administrative and International boundaries.</p> <p>Location: British Library, St Pancras, Map library.</p>
--	--

8. Sixitaanka qaladaadkii ka soo baxay doorashooyinkii hore

Si loo saxo qaladaadkii laga soo arkay doorashooyinkii hore, waxaa lagama maarmaan noqday in la fiiriyo wixii talo bixin ah ee laga soo jeediyay arrinkaasi. Talooyinkii qoraalka ahaa ee laga soo jeediyay waxay u qaybsamaan laba nooc. Ta hore oo ah qoraallo warbixin ah oo ururro caalamiya oo shisheeya ahi ka soo talo bixiyeen, iyo talooyin laga soo jeediyay dalka Somaliland gudihisa oo loo soo diray Golaha Wakiilada. Talooyinka laga soo jeediyay dalka gudihisa aad ayey u tiro yaraayeen. Waxaa ka mid ahaa talooyin qoraal ah oo Golaha Wakiiladu hore uga helay Gudida doorashooyinka qaranka, Xisbiyada siyaasiga ah, Akadamiyadda Nabadda iyo houmarka iwm. Hase ahaatee talooyinka xeerkan doorashadu aad uga faaiidaystay waxay ka kala yimaadeen Gudida doorashada ee Qaranka iyo Akaadamiyadda Nabadda iyo horumarka.

Sidoo kale, waxay gudidu deristay wixii warbixin ahaa ee laga qoray doorashooyinkii hore dalka uga qabsoomay. Warbixinadaasi ay gudidu tixgelisay waxaa ka mid ahaa warbixinadii ka soo baxay International Crisis Group, UNHCR, Norwegiaan Centre for Human Rights, InterAfrica Group, National Electoral Commission, NAGAAD & COSONGO. Gudidu iyagoo isu dhan ayey soo jeedinadii qoraalka ahaa ee ka soo taalo bixinayey xeerka doorashada, u eegeen qodob qodob. Qodobadii gudidu isla wada garatay in la qaato waa lagu kordhiyey xeerka. Waxaa kale oo jira qodobbo aad u tiro yar oo gudidu aanay isku wada raacin, oo markaasi la qaatay dhinaca gudida shanta ka koobnayd u badatay. Waxaana jiray talooyin la soo qoray oo ay gudidu u aragtay in aanay haboonayn maanta in lagu daro xeerkan.

9. Xeerka doorashada Golaha Wakiilada

Xeerka doorashada Golaha Wakiiladu wuxuu ka kooban yahay:

- a) Qodobbo aan u baahnayn in wax laga bedelo oo la mid ah qodobada xeerkaa doorashada ee deegaanada iyo madaxtooyada Lr. 20 /2001
- b) Qodobbo cusub oo ku saabsan arrimo muran ka taagnaa, gudidani go'aan ka gaadhay, sida saami qaybsiga kuraasta golaha wakiilada oo ah kuraasta uu ka heli karo gobol kastaa 82 kursi ee goluhu ka koobanyahay, iyo kala xadaynta gobolada.
- c) Qodobbo cusub oo loo baahday in lagu soo kordhiyo xeerka doorashada, kadib markii la arkay qaladaadkii ka soo baxay doorashooyinkii hore uga qabsoomay Somaliland.
- d) Qodobbo u baahday in wax laga bedelo kadib markii laga faaiidaystay waayo-argnimadii laga helay doorashooyinkii hore.

Xeerku wuxuu u qaybsamaa 8 qaybood oo kala ah:

- 1) Mabaadiida guud
- 2) Hanaanka doorashada
- 3) Musharixiinta
- 4) Ololaha doorashada
- 5) Diyaar garowga iyo maamulka doorashada
- 6) Sharciyeynta Natijada doorashada.

- 7) Ku xadgudubka xeerka iyo nidaamka doorashada
- 8) Qodobbo qubane ah

Guud ahaan wuxuu xeerkan doorasho ka koobanyahay 70 qodob.
